# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Golaha Wakiilada JSL.

# XEERKA ISGAADHSIINTA SOMALILAND

## XEER NO: 50/2011

**REPUBLIC OF** **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

REF. JSL/M/XERM/249-623/072011 DATE 05/07/11

# XEER MADAXWEYNE No: 0164/072011

## Dhaqan-galka Xeer Lr. 50/2011
## Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-15/526/2011, ee Ansixinta Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta,

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saaray,**

Dhaqan-galka Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta ee Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer Lr. 50/2011.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND President

RECEIVED RL: 111 07/07/2011

Ref: GW/G/KF-15/526/2011 Date : 02/07/2011

## Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Boosaaha iyo Isgaadhsiinta

## (No: 50/2011)

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Mashruuc Xeer lambar **50/2011** Xeerka Isgaadhsiinta Somaliland |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka **38**aad, **61(2)**aad,iyo **13**aad ee Dastuurka JSL. |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka **77**aad iyo **78**aad Hab raaca Xeer Dajinta. |
| MARKUU ARKAY: | Go,aanka ansixinta Golaha Guurtida JSL **01/03/2011**. |
| MARKUU ARKAY : | In Golaha Guurtida wax ka badal iyo kaabis ku samaynin Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland Xeer Lr **50/2011** kuna Ansixiyeen cod dhan (75) mudane (1) mudane diiday (1) Mudanena ka aamusay Gudoomiyuhuna muu codayn, sidii Golaha Wakiladu ugu gudbiyeena ku ansixiyeen |

## WUXUU

Si uu uguto Waajibaadkiisa Dastuuriga ah waxa Golaha Wakiilada Siidisa Ugu Soo Gudbiyay Madax Waynaha JSL Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta **Xeer No,50/2011**

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**C/casiis Maxamed Samaale**
**K/S Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**
**Ahna Gudoomiye Ku Xigeenka 1aad**

# CUTUBKA 1aad: QODDOBADA GUUD

## Qoddobka 1aad: EREY BIXIN

1) **Suurta gelin**: waxaa loola jeedaa suurta gelinta  shirkad haysata liisanka adeegga isgaadhsiinta, taas oo uu ku jiro xidhidda qalabka waayirka leh, kuwa aan waayirka lahayn, iyo xadhkaha badda hoos mara, suurto gelinta kaabayaasha isgaadhsiinta oo ay ku jiraan dhismayaasha, suurto galnimada isku xidhka xidhiidhka teleefoonada ama soo bandhigidda xidhiidhka isgaadhsiineed ee u dhigma.

2) **Qoondayn**: waxaa loola jeedaa qoondaynta hirarka radiyaha ee ay Wasaaraddu/Komishanku u qoondeeyaan isticmaalka adeegyo kala duwan.

3) **Astayn**: iyadoo la tixgalineyo hirarka raadyaha waxaa loola jeedaa astaynta hirar gaar ah oo uu isticmaalo rukhsadluhu.

4) **Komishan**: waxaa loola jeeda Komishanka Isgaadhsiinta Qaranka kaas oo uu abuurayo xeerku.

5) **Guddi**: waxaa loola jeedaa Gudida Komishanka ee xeerkani abuuray.

6) **Warbaahin**: waxaa loola jeedaa xadhkaha isgaadsiinta raadyaha ama isgaadhsiinta dayaxgacmeedka ee loogu talagalay in si toosa dadweynuhu u helo marka laga reebo adeegga muuqaal soo celiyaha (Video on demand).

7) **Guddoomiye**: waxaa loola jeedaa Gudoomiyaha Guddida Komishanka isgaadhsiinta Qaranka.

8) **Heerarka Ruqsadda**: waxaa loola jeedaa qaybaha liisaanada isgaadhsiinta ee ku soo baxa si xeerkan waafaqsana marka laga reebo kuwa gaarka ah.

9) **Habka Tashiga**: waxaa loola jeedaa xalaalnimada iyo kala soocid la'aanta uu ku dhaqmo Komishanku si loo helo aragtida dhinacyada oo dhan oo ay ku jiraan Ruqsadlayaasha, isticmaalayaasha iyo Qaybaha Dowladda, iyada oo mudnaanta la siinayo go'aanka guddida iyo tixgelinta soo jeedimaha dhinacyada ay khuseyso isgaadhsiintu. Dhinacyada danaynaya go'aamada komishanka waxa ay aragtidooda ku soo gudbin karaan muddo 30 ilaa 90 maalmood ah ka dib marka go'aamadu ka soo fulaan Komishanka iyaga oo awood u leh in ay sameeyaan wada tashi ay u madaxbanaan yihiin

10) **Agaasimaha Guud**: waxaa loola jeedaa Agaasimaha guud ee Wasaaradda Boosaha & Isgaadhsiinta.

11) **Liisan Hirarka**; waxaa loo la jeedaa Ruqsadda Hirarka Isgaadhsiinta ee lagu bixiyo si xeerka waafaqsan.

12) **Habka Isgaadhsiinta Moobaylka ee adduunka (GSM)**: Waxa loola jeeda isticmaalka hirarka isgaadsiinta ee 900MHz,1800MHz,1900MHz iyo mawjadaha lagu soo kordhiyo ama Komishanku soo kordhiyo.

13) **Ruqsada gaarahaaneed**: waxaa loola jeeda ruqsad isgaadhsiineed ee si gaar ah shirkad loo siiyo iyadoo xeerkan la raacayo.

14) **Xog**: waxaa loola jeedaa caddaymaha, tilmaamaha, qoraalada, codka iyo xogta kale.

15) **Xogta casriga**: waxaa loola jeedaa maaraynta, rogroginta iyo kaydinta warka iyada oo la isticmaalayo habka danabaysan ee casriga ah.

16) **Isku xidhka**: waxaa loola jeedaa isku xidhka xidhiidhka isgaadhsiinta iyadoo la isticmaalayo, gudbiyayaal si macaamiisha shirkadaha isgadhsiintu awood ugu helaan la xidhiidhka macaamiisha ay isku shirkadda yihiin iyo kuwa shirkadaha kale.

17) **Xeer**: waxaa loola jeedaa Xeerka Isgaadhsiinta Somaliland.

18) **Ruqsad**: waxaa loola jeedaa ogalaanshaha Wasaaraddu bixisay iyo kuwa ay bixin doonan Komishanku ama heshiiska Wasaaradda/Komishanku la galo shirkad, kaas oo shikadda u oggolaanaysa aasaasidda, maamulidda iyo maaraynta xidhiidhka isgaadhsiinta ama u soo bandhigidda bulshada adeegga isgaadhsiinta amaba hirarka idaacadaha si waafaqsan xeerkan ama xeer hoosaadyada uu oggolaado xeerku.

19) **Ruqsadda adeegga isgaadhsiinta:** waxaa loola jeedaa ruqsad shirkad loogu oggolaaday inay bixiso adeegga isgaadhsiinta si xeerkan waafaqsan.

20) **Ruqsadle:** waxaa loola jeedaa shirkadda la siiyay oggalaansho adeegga isgaadhsiinta si xeerkan waafaqsan.

21) **Xarunta dhexe ee telefoonada:** waxa loola jeedaa meesha ay isugu yimaadaan telefoonada macaamiisha isku shrikadda ah.

22) **wasiirka ama Wasaaradda**: waxaa loola jeeda Wasiirka ama Wasaaradda Boosaha iyo isgaeadhsiinta

23) **Isgaadhsiinta raadiyaha wareega** (Mobile Radiocommunications)**:** waxaa loola jeedaa qalabka isgaadhsiinta ee dira ama qabta signalka (signals) isgaadhsiinta raadyowga.

24) **Qorshaha Qaran ee hirarka isgaadhsiinta:** Waxaa loola jeedaa qorshaha qaran ee hirarka isgaadhsiinta ee ay diyaarisay Wasaaraddu ama uu diyaarin doono Komishanku isla markaana maamulaan iyaga oo la tashanaya Ciidanka Qaranka iyo hay'adaha amniga.

25) **Qorshaha qaran ee lambarada isgaadhsiinta**: waxaa loolo jeeda qorshaha qaran ee lamberada ee ay Wasaaraddu diyaarisay ama uu diyaarin doono Komishanku isla markaana maamulayaan iyadoo loo isticmaalayo xidhiidhka adeegga isgaadhsiinta Somaliland.

26) **Shabakadda isku xidhka**: waxa loola jeedaa habka isku xidhka adeegga isgaadhsiinta ee loo isticmaalayo in la bixiyo hal ama wax ka badan adeegga isgaadhsiinta.

27) **Ogaysiis**: waxa loola jeeda qoraalka rasmiga ah ee loo diro la-ogaysiiyaha.

28) **Shirkad leh awoodda suuqa**: waxa loola jeedaa shirkad kasta oo ruqsad u leh si waafaqsan Qod:51 ee xeerkan isla markaana fidisa adeegyadii ruqsadda loo siiyay.

29) **Qof:** waxa Lola jeedaa cid kasta oo leh shakhsiyad qaanuun (legal personalaty).

30) **Khadka adeegga gaarka ah:** waxa loola jeedaa adeegga isgaadhsiinta ee macmiishu u isticmaasho si gaar ah, muddo xaddidan, iyagoo ka bixinaya qiime go'an oo aan loo eegayn inta uu dhab ahaan isticmaalayo qalabka.

31) **Adeeg bixiye:** waxa loola jeedaa cidda bulshada u samaysa adeegga isgaadhsiinta.

32) **Shebekedda Isgaadhsiinta gaarka ah:** Waxa loola jeedaa habka isgadhsiinta ee qof ama koox ay maamulaan taas oo la wadaago iyada oo loo isticmaalayo in ay daboosho baahida.

33) **Shabakadda Isgaadhsiinta Guud:** waxa loola jeedaa isgaadhsiinta isugu xidhan si buuxda isla markaana ka kooban xidhayaal iyo gudbiyayaal taas oo adeegga isgaadhsiintu u gudbiyo macaamisha si xeerkan waafaqsan.

34) **Shirkadda Isgaadhsiinta guud**: waxaa loola jeedaa shirkadda ama cidda ruqsad loo siiyey inay macaamiisha / bulshada u sameeyaan adeegga shebekedda isgaadhsiinta.

35) **Adeegga isgaadhsiinta guud:** waxaa loola jeedaa adeegga isgaadhsiinta ee wareega ama qotoma isla markaana macaamiishu ka faa'iidaysan karaan.

36) **Isgaadhsiinta raadiyaha:** waxaa loola jeedaa qalabka isgaadhsiinta oo loo isticmaalo qabashada iyo gudbinta iyadoo loo adeegsanayo hirarka raadiyaha ee kor loo diro kana hooseeya 3,000GHz.

37) **Qalabka raadiyaha**: waxa loola jeedaa qalab kasta oo loogu talo galay isticmaalka isgaadhsiinta raadiyaha.

38) **Mawjadaha hirarka raadiyaha:** waxaa loola jeedaa mawjadaha danabaysan ee 3KHz ilaa 3000GHz ee looga faa'idaysto qabashada iyo maamulidda isgaadhsiinta.

39) **Saldhigga Raadiyow**: waxaa loola jeedaa mid iyo in ka badan oo ah gudbiye hele ama isku xidhka gudbiyayaal iyo heleyaal oo ay ku jiraan qalabka ugu mihiimsan ee loogu tala galay meel gaar ah si loo gudbiyo isgaadhsiinta raadiyaha, raadiyaha cilmi falagga, ama adeegga warbaahinta.

40) **Dib u iibin**: waxaa loola jeedaa dib u iibinta isgaadhsiinta macaamiisha iyada oo loo marayo iibiye kale.

41) **Macaamiil:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo heshiis kula jira shirkad isgaadhsiineed si uu u helo xidhiidhka adeegga isgaadhsiinta.

42) **Isgaadhsiin:** waxaa loola jeedaa nidaamka adeegga sii daynta, leexinta, gudbinta ama qabashada cod ama hadal, humaag ama bidha (signal) loo arki karo codad, humaag, sawir ama xog qarsoon iyada oo la isticmaalayo xadhig, raadiye, xasaw gudbin sare leh (optical) ama habab danabaysan.

**43) Qalabka isgaadhsiinta:** waxaa loola jeedaa qalab kasta oo loo isticmaalo ama loogu talagalay in loo isticmaalo isgaadhsiinta kaas oo ku xidhan shebekedda isgaadhsiinta oo uu ku jiro qalabka raadyawgu.

**44) Fududeeyayaasha isgaadhsiinta:** waxaa loola jeedaa qayb kasta oo ka mid ah kaabayaasha shebekedda isgaadhsiinta taas oo ay ku jiraan tiirka (anteenada), mareegta, dhuumaha ama tuubada, xasawda gudbinta sare leh, khadka (laynka), tiirarka iyo taawarada, ama wax kasta oo xidhiidhiya shebekedda isgaadhsiinta.

**45) Hirarka isgaadhsiinta:** waxaa loola jeedaa hirar kasta oo loo qoondeeyey sida ku xusan jaantuska qaran ee hirarka, kaas oo ay ku jiraan hirarka loo isticmaalo isku xidhka raadiyaha gacanta (iyada oo aan loo eegayan tiknoolajida la habeeyey iyo adeegga faca sadexaad (3rd Generation) ee teleefoonada aan xadhkaha lahayn, isgaadhiinta aragtida tooska ah, kaydiyaha lambarada (bayjar), taleefoon gacmeedka, dayaxgacmeedka, teleefoonada… I.W.M.

**46) Shabakadda isku xidhka:** waxaa loola jeedaa shebekedda fududaynaysa gudbinta farriimaha, codadka, muuqaalka, ama bidha (signal) u dhexeeya barta gudbinta ee xadhiga, raadyawga, xasawda gudbinta sare leh ama mareegta danabaysan.

**47) Adeegga is gaadhsiinta:** Waxaa loola jeedaa adeegga is gaadhssiinta ee ka kooban guud ahaan ama gaar ahaan dirista ama qabashada ama marinta xogta ee shebekedda iyada oo la isticmaalayo hababka isgaadhsiinta.

**48) Qalabka is gaadhsiinta ee bar kulanka:** Waxaa loola jeedaa qalabka loo adeegsanyo dirista, qabashada, marinta, ama bar dhammaadka isgaadhsiinta.

**49) Oggolaanshaha nooca qalabka:** waxaa loola jeedaa oggolaashaha isticmaalka ama soodejinta noocyada kala duwan ee qalabka isgaadhsiinta iyo qalabka isgaadhsiinta bar kulanka.

**50) Qoolka isgaadhsiita ee aan isku soohnayn:** waxaa loola jeeda isku xidhka muuqda ee ka yimaada goobta macaamiisha kuna xidhan xarunta dhexe ee telefoonada isgaadhsiinta guud ee shirkadda, marka laga reebo gudbinta ama godadka isgaadhsiinta, oo ay shirkad ka iibsatay shirkad kale.

**51)** **Adeegga guud**: waxaa loola jeeda inta ugu yar ee adeeg isgaadhsiineed ee leh tayo gaar ah iyo qiime macquul ah kaas oo ay heli karaan dhammaan macaamiishu iyada oo ka madax banaan juquraafiyadda halka uu deggan yahay, iyo fududaynta xaaladda macmiisha sida adeegga si waafaqsan xaaladaha.

**52)** **Macaamiisha:** waxaa loola jeedaa dadka isticmaalaya ama codsanaya adeegga isgaadhsiin guud ee dalka laga heli karo.

**53)** **WBI**: waxaa loola jeedaa Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta

**54)** **Qiimaha dulsocodka dheeraadka ah:** waxaa loola jeedaa**:**

- **a)** Wax ka bedelka qorshaha, nuxurka, summadda (code), habka ama qaybaha kale ee xogta loogu gudbiyo macaamiisha isgaadhsiinta.
- **b)** Xaaladda xogta loogu gudbinayo macaamiisha taas oo ay ku jirto dib u qaabaynta xogaha iyagu soo gudbiyeen.
- **c)** Soo bandhigidda xogta u kaydsan xidhiidhka macmiisha.

**55)** **Muuqaal soo celiye:** waxaa loola jeedaa adeegga isgaadhsiinta ee fududeeya in macaamiishu daawadaan nuxurka muuqaalka iyaga oo isticmaalaya shebekedda isgaadhsiinta mar kasta oo macmiishu adeegaas doonaan (dalbadaan).

Eray kasta ama weedh kasta oo aan lagu qeexin xeerkan waxa loo fasiri doonaa si waafaqsan qeexidda ay u dejiso Wasaaraddu, iyada oo lagu soo Sheegayo nuxurka heshiisyada caalamiga ah ee isgaadhsinta iyo sida ay u macnayso Midowga Isgaadhsiinta Caalamka (International Telecommunications Union).

## Qoddobka 2aad: Ujeedooyinka iyo Awoodaha

1) Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Isgaadhsiinta Somaliland
2) Xeerkan waxa uu maamuli doonaa dhammaan qaybaha isgaadhsiinta ee ku jira soohdimaha Somaliland marka laga reebo isgaadhsiinta ay isticmaalaan Ciidamadda Kala duwan ee dalka.

3) Xeerkan waxaa lagu ilaalinayaa horumarinta adeegyada *Isgaadhsiinta* iyada oo loo eegayo baahiyaha bulshada iyo kuwa dhaqaale ee Somaliland, ilaalinta isticmaalayaasha. *Fulinta sharcigan waxaa* lagu *xaddidayaa qaybaha isgaadhsiinta ee kala duwan.*

**4)** Xeerku waxa uu si buuxda u difaacayaa maalgashiga adeegyada isgaadhsiinta iyada oo mudnaan la siinayo shirkadaha maxaliga ah ee ku foogan adeegyadaas, isla markaa Wasaaradda iyo Komishankuba sideeda u aqoonsandoonaan dhamaan heshiisyadii ka horeeyay xeerkan ee wasaaradu gashay.

**5)** Dhammaan shuuruucda ku habboon iyo xeerarka maamulka ee hadda jira waxa ay shaqayn doonaan ilaa iyo inta xeerku uu dhaqangal ka noqonayo, qodob kasta oo xeerkan khilaafsanina waa waxba kama jiraan.

**6)** Dhammaan farsamooyinka la xidhiidha fulinta qoddobada xeerkan haddii ay daruuri noqoto waxaa lagu soo saari Xeer Madaxweyne iyada oo uu soo jeedinayo Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta.

***7)*** Iyada oo la dhiirri gelinayo habka isgaadhsiinta casriga ah lana tixgelinayo shuruucda isgaadhsiinta ee caalamiga ah Wasaaradda waxaa xil ka saran yahay in ay soo dhammaystirto shuruucda iyo xeer hoosaadyada komishanka , *waxayna si tartiib ah komishinka ugu diyaarinaysaa in uu xilkiisa u madax banaanaado*

# Cutubka 2aad: Wasaaradda

## Qoddobka 3aad: Waajibaadka Wasaaradda

Waajibaadka Wasaaradda waxaa ka mid ah:

**1)** Horumarinta siyaasada guud ee isgaadhsiinta iyo farsamada xogta casriga ah ee Somaliland, iyada oo la tashanaysa dhinacyada ay khusayso. Wasaaraddu waxa ay Madaxweynaha iyo xukuumadda wakiil uga tahay qeexidda yoolka fog (istaraatijiyadda) qaran ee qaybaha isgaadhsiinta si waafaqsan siyaasadda xukuumadda.

**2)** Wasaaraddu waa in ay *diyaarisaa* siyaasadda guud iyo qorshaha isgaadhsiinta dalka oo u qaabaysan saddexdii sannadoodba mar, waxayna hor dhigaysaa Golaha xukuumadda si loo ansixiyo.

**3)** Wasaaraddu waxa ay u xil-saaran tahay kormeerka fulinta iyo dhaqan gelinta xeerka, siyaasadda iyo qorshaha xubinta hore lagu sheegay ee Isgaadhsiinta Somaliland.

**4)** Wasaaraddu waxay horumarinaysaa *Istaraatejiyadda* lagu fidin karo baaxadda adeegga isgaadhsiinta casriga ah si ay ula jaanqaadaan horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha Somaliland.

**5)** Xoojinta *ka qayb qaadashada* kaalinta dalku ku leeyahay tartanka isgaadhsiinta casriga ah ee heer gobol iyo heer caalami.

**6)** *Waxay diyaarisaa* qorshe dhiirigalinaya maalgashiga isgaadhsiinta iyo farsamada xogta casriga ah iyada oo abuuraysa jawi iyo saaxad ay ku suura geli karto iyo qiime munaasib u ah macaamiisha.

**7)** *Waxay* u ololaysaa ka mid noqoshada ururada caalami iyo Goboleed ee isgaadhsiinta iyo in ay xaqiijiso fulinta waajibaadka dalka ka saaran dhowrista iyo ku dhaqanka heshiisyada Somaliland qayb ka tahay ee heer Gobol iyo heer caalami ee ku lug leh Isgaadhsiinta iyo farsamada xogta casriga ah*, iyadoo mar walba ka duulaysa danta Qaranka*

**8)** *Waxay u xil saaran tahay* kor u qaadista farsamada xogta casriga ah, iyada oo la kaashanaysa Komishanka, Wasaaradaha kale ee arrinku khuseeyo iyo shirkadaha, jaamacadaha iyo shakhsiyaadka danaynaya ama khibrada iyo aqoonta u leh.

**9)** Wasaaradda ama ciddii ay u egmato ayaa dalka ku metelaya kulamada dawliga ah ee la xidhiidha isgaadhsiinta. Sidoo kale Wasaaraddu iyada oo ku kormeeraysa waxa ay u igman kartaa shirkad ay heshiis la gashay khibradna u leh in ay dalka ku metesho ka qaybgalka ururada

kaybalada (xadhkaha) badda hoosteeda mara ,xadhkaha Barriga iyo dayaxgacmeedyada isgaadhsiinta, ama ururada kale ee heshiisyo caalami ah lagu aasaasay si kor loogu qaado cilmi baadhista, tayeynta adeegga iyo horumarinta isgaadhsiinta iyo farsamada xogta casriga ah. *Iyadoo shirkadu ka faa,iidaysanaysa awoodeeda dhaqaale iyo farsamo waxay macluumaadka shirka u soo gudbinaysaa wasaaradda.*

**10)** In ay dhiiri galiso, dalka iyo dibeddaba sidii looga heli lahaa fursado waxbarasho, tacliin sare iyo barnaamijyo lagu tababarto isgaadhsiinta iyo farsamada xogta.

**11)** Wasaaraddu Waxay bulshada ku wacyi galisaa mudnaanta iyo kaalinta isgadhsiinta iyo helidda farsamada xogtu ku leeyahiin kobcinta dhaqaalaha, hormarinta bulshada iyo ilbaxnimada dalka.

**12)** *Wasaaradu waxay* isku xidhaa, fulisaana adeegyada lagama maarmaanka u ah Komishanka iyo ciidamada si loo diyaariyo qorshaha qaran ee mawjadaha hirarka Raadayaha; iyada oo la adeegsanayo habka ugu sarreeya oo looga faa'iidaysan karo adeegsiga hirarka, isla markaana, looga hortegayo in ay isku milmaan isgaadhsiinta ciidamada iyo ta shacabka.

**13)** *Wasaaradu waxay diyaarisaa* mabaa'dida guud ee xeer hoosaadyada la xidhiidha adeegga isgaadhsiinta Somaliland *ee lagu dhaqan galinayo xeerkan.* Isla markaana Wasaaraddu waxa ay hubin*aysaa* dhaqan galkooda iyada oo la kaashanaysa Komishanka.

***14)*** Si *loo tayeeyo isgaadhsiinta dalka*, *Wasaaraddu* waxa ay ururin*aysaa xafidaysaana* xogaha la xidhiidha isgaadhsiinta hay'addaha iyo laamaha kale ee dawladda ama kuwa gaarka loo leeyahay, Iyadoo aan wax loo dhimayn xorriyadda isgaadhsiinta ee dastuurku bixiyey.(eeg Qod. 30aad ee dastuurka***)***

**15)** *Wasaaradu waxay u xil saaran tahay* sidii loo tirtiri lahaa wixii carqalado ah ee ku iman Kara Isgaadhsiinta iyo farsamada xogta caalamiga ah, iyada oo la tashanaysa Komishanka iyo ciddii kale ee ay khusayso.

**16)** Wasaaraddu waxay ilaalisaa habsami u isticmaalka adeegga Isgaadhsiinta internetka iyo adeegyada kale ee isgaadhsinta.

**17)** In ay dhiiri galiso habsami u isticmaalka adeega isgaadhsiinta internetka iyo adeega kale ee isgaadhsiinta.

**18)** Wasaaradda Boosaha Iyo Isgaadhsiinta JSL iyaddaa dalka uga masuul ah maalgelinta, soo dajinta, dhismaha, xarumaha, signalka iyo

dhigista xadhkaha dhulka la hoos marinayo ee dhamaan Goboladda iyo Degmooyinka dalka Jamhuuriyadda Somaliland;

**19)** Sidoo kale haddii ay wasaaradu awoodi kari waydo hirgalinta mashruucan dhaqaale ahaan iyo farsamo ahaanba, iyadoo ku kormeeraysa waxay u igman kartaa lana galaysaa heshiis leh muddo cayiman maamulka iyo maalgalinta mashruuca kaybalka ee badda iyo barigaba shirkad wadani ah oo leh mug dhaqaale iyo mid farsamo casri ah oo ay ku fuliso hawsha mashruuca loo igmaday;

**20)** Ruqsadii ay Xukuumadu bixisay iyo heshiiskii ay gashay ee khuseeyey xadhkaha cabbl-ka intii aanu xeerkani soo bixin ka hor, komishanka iyo wasaaraduba waxa ay u aqoonsanayaan dhaqan gal waxaana loo fulinayaa sidoodii.

**21)** Waxaa ku waajib ah shirkadda la siiyey ruqsadda keenista xadhiga isgaadhsiinta badda hoos mara (fiber optic cable) in ay dalka wada gaadhsiiso xadhiga cableka iyadoo u marinaysa dariiqa lagama maarmaanka u noqda.

## CUTUBKA 3AAD: KOMISHANKA ISGAADHSIINTA QARANKA

### Aasaasida Komishanka Isgaadhsiinta Qaranka

### Qoddobka 4aad: Abuurista Komishanka Maamulka Isgaadhsiinta

**1)** *Waxa xeerkan lagu aasaasayaa* Komishanka Qaran oo magaciisu ku dhammaystiran yahay Komishanka Isgaadhsiinta Qaranka ***oo loo*** dhisayo si xeerkan waafaqsan, waxaana la xisaabtamaya Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta.

**2)** Komishanka isgaadhsiintu waxa ay u madaxbanaan yihiin habsami u *gudashada xilkooda* iyagoo ku salaynaya qodobadda xeerkan.

**3)** Waajibaadka Komishanka waxaa ka mid ah:-

***a)*** *Komishinku waxay* Wasaaradda ku metelaan xilka loo igmaday si loo xaqiijiyo ujeedooyinka loo abuuray.

***b)*** *Waxay Komishinku* qaadaan dhammaan talaaboyinka lagu fulinayo xeerkan ee lagama maarmaanka ah, taas oo ay ku jirto, xaqa dacwad oogista, iyo in ay garyaqaan u qabsadaan danaha Komishanka si ay Wasaaradda iyo Komishanku ugu metelo sharciga hortiisa.

***c)*** Si uu Komishanku waajibaadkiisa u guto wuxuu heshiisyo la geli karaa dhinacyo kale ama cid kale oo takhasus u leh hawlaha isgaadhsiinta, sida xeeldheerayaal farsamo, machadyo aqooneed iyo guddiyo la-talineed. Iyagoo la socodsiinaya dhamaan go'aanadda ay gaadhaan wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta.

***d)*** Si loo *fududeeyo xil-gudashadoodda* Komishanku waxa ay xaq u leeyahiin in ay u igmadaan qaar ka mid ah hawshooda farsamo ama maamul dhinac saddexaad ama waaxaha dawladda, kuwaas oo leh aqoon farsamo iyo khibrad maamul.

***e)*** Agaasimaha guud waa xubin ka mida Komishanka, komishankaana iska dhex dooranaya maamulkiisa**.**

***f)*** Komishanka Isgaadhsiintu waxay yeelanayaan dhammaan *awoodaha* ay u wakiilatay Wasaaraddu.

***g)*** Xarunta Komishanku *waa* Caasimadda Hargeysa, waxayna laamo ka furan karaan Gobolada iyo degmooyinka dalka JSL.

***h)*** Komishanku waxa uu ka koobnaanayaa Todoba xubnood, waxaana soo xulaaya Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta isagoo ku soo xuli doona sifooyinkan *laguna soo saarayo xeer Madaxweyne:-*

- **i.** Laba Xubnood (Ururka shirkadaha isgaadhsiinta)
- **ii.** Hal Xubin (Aqoonyahano ku xeeldheer aqoonta isgaadhsiinta)
- **iii.** Hal Xubin (Garyaqaan ku takhasusay shurrucda)
- **iv.** Laba xubnood (Aqoonyahan Matalaya Macaamiisha (Customers).
- **v.** Hal Xubin Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta Jsl

4. Marka wasiirku soo xulo xubnaha komishanka wuxuu Madaxweynaha Jsl u gudbinayaa Laba iyo Toban (12) xubnood marka laga reebo Agaasimaha Guud oo ku imanaya xilkiisa, iyadoo laga soo xulayo laba xubnood (2) Xubin Kasta kuna salaysan aqoonta xeerku xusay.

**5.** Komishanka Isgaadhsiintu waxay yeelanayaan dhammaan xuquuqda ay u wakiilatay Wasaaraddu.

## Qoddobka 5aad: Awoodda iyo Waajibaadka Komishanka

Waxa waajib ka saaran yahay Waxa Komishanka awoodna uu u leeyahay:-

**1)** In ay ka talo bixiyaan *diyaarinta* xeer-hoosaadyada la xidhiidha qaybaha isgaadhsiinta, kana qayb qaataan fulintooda.

**2)** In ay soo saaraan xeer-*nidaamiyeyaal* iyo go'aamada lagama maarmaanka u ah fulinta *xilkooda iyo* xeerkan, kuwaas oo ay ka mid yihiin, xeerarka aasaasiga ah ee farsamada, Ruqsadaha iyo soo jeedinta cashuuraha la xidhiidha maaraynta hirarka, kala soocidda xisaabaha, isku xidhka, galaan-gal u yeelashada shebekedaha iyo adeegyada isgaadhsiineed, talo ka bixinta tacriifadaha, lambarada, adeegga caalamiga ah, kobcinta tartanka isgaadhsiinta, xallinta khilaafaadka *shirkadaha iyagoo u saaraya gudiyo farsamo oo dhexdhexaadiya,* oggolaanshaha qalabka, iyo hubinta tixgelinta shuruudaha Ruqsada.

**3)** In ay ilaaliyaan xuquuqda macaamiisha, isla markaana xaqiijiyaan shuruudaha Ruqsadda iyada oo si gaar ah loo eegayo:-
   - **a)** Tacriifada Addeegga
   - **b)** Suurtagalnimada iyo helidda adeegga
   - **c)** Tayada iyo heerka adeegga.
   - **d)** Ilaalinta Sirta Iyo Xogaha Adeegga.

**4)** In ay qaadaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah si ay u xakameeyaan ciddii jebisa, ku xad gudubta ama ku talax tagta shuruudaha kor ku xusan.

**5)** In ay kor u qaadaan shirkaduhu isla markaana dhiirigeliyaan in tartan firfircoon oo xalaal ah uu dhex maro, isla markaana qaadato talaabooyinka lagama marmaanka u ah ee la xidhiidha:-

   - **a)** In ay ka-dheeraadaan Hab-dhaqan kasta oo ka soo horjeeda tartanka xorta ah si ay u xaqiijiyaan furfurnaanta suuqa, waxaa kaloo xil ka saaran yahay in ay xayiraan qof kasta ama Ruqsadle kasta oo isku dayaya inuu si qaloocan uga faa'idaysto Macaamiisha**.**

   - ***b)*** In ay diyaariyaan *shuruudaha*, halbeegga, iyo habka loo bixinayo liisamada shebekadaha, adeegga isgaadhsiinta iyo isticmaalidda mawjadaha raadyaha, *iyada oo aan waxba loo dhimayn shuruudaha xeerkani jideeyey.*
   - **c)** In ay darsaan codsiyada adeegga isgaadhsiinta guud, isla markaana soo saaraan go'aamo la xidhiidha codsiyada si loo dhammaystiro soo saaridda ruqsadaha hirarka raadyawga, ruqsadaha isgaadhsiinta, bixinta ruqsadaha, fulinta, kormeerka, joojinta iyo ruqsad kala

noqoshada si xeerkan waafaqsan,*iyadoo go,aankoodu kama* dambays ahna ogaysiin ku siinaya Wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta.

**d)** In ay jaangooyaan heerka ugu hooseeya ee tayada adeegga Ruqsadluhu u samaynayo macaamiisha, iyaga oo la tashanaya Ruqsadlaha isla markaana u kuurgelaya u hoggaansamida shuruudaha ruqsadda iyo xeerka.

**e)** In ay ururiyaan codsiyada bilawga ah, kuwa sannadlaha ah iyo cashuurta cusboonaysiinta Ruqsadaha, ururinta ganaaxyada iyo cashuraha ruqsadaha iyo ururinta cashuurta adeegyada isgaadhsiinta, si waafaqsan xeerarka Maaliyadda.

**f)** Inay maamulaan isticmaalka isgaadhsiinta bulshada rayidka ah ee hirarka raadyaha, kuwaas oo ka soo lalinaya xogta gaadiidka dushiisa, dhulka, cirka, Badda ama dayaxgacmeed. Komishanku waxa uu u xilsaaran yahay diyaarinta qorshaha qaran ee xaddidaya hirarka, iyo qorshaha diiwaan gelinta rugaha hirarka isgaadhsiinta, iyaga oo la kaashanaya *wasaaradda iyo ciddii kale ee ay khusayso.* Waxa kale oo uu xil ka saaran yahay socodsiinta qaybta Rayidka ee qorshaha Qaranka ee la xidhiidha qoondaynta hirarka iyo diiwaanka qaranka e hirarka, iyo baahinta xeerarka la xidhiidha hirarka isgaadhsiinta.

**6)** In ay kala shaqeeyaan Komishanada dhiggooda ah ee ka jira dalalka kale, isku xidhka hirarka isgaadhsiinta iyada oo la raacayo xeerarka ururka caalamiga ah ee isgaadhsiinta.

**7)** In ay bixiyaan ruqsadaha hirarka iyada oo loo raacayo qorshaha qaran ee hirarka lana kaashanaya *Wasaarada* iyo in ay kormeeraan isla markaana fuliyaan habka isticmaalka mawjadaha isgaadhsiinta ee dalka si waafaqsan xeerkan iyo shuruudaha Ruqsadda, si ay u xaqiijiso isticmal tayo leh.

**8)** In ay dhiirri geliyaan kana shaqeeyaan suurta gelinta isku xidhka adeegga oo ay ku jirto in shirkadaha isgaadhsiintu wadaagi karaan adeegga iyo Hantida.

**9)** Inay soo saaraan tilmaamo maamul, si ay u maamulaan isticmaalka shebekadda isgaadhsiinta iyo shuruudaheeda isku xidhka, isla markaana wasaaradda uga ansixiyaan heshiisyada isku xidhka hoose iyo xaqiijinta in aan la jebin heshiisyadaa.

**10)** Inay ka garnaqaan cabashooyinka macaamiisha, baadhista iyo dabagalka adeeg bixiyayaasha, iyo inay hubiyaan sugidda cabashoyinka, isla markaana xal u helaan khilaafka u dhexeeya Ruqsadlayaasha, macaamiisha iyo cid kastoo ku lug leh hawlaha is gaadhsiinta, iyaga oo qaadaya talabada ku habboon.

**11)** Inay ku dhaqmaan dhexdhexaadin ama xaqsoornimo kana go'aan qaataan khilaaf kasta oo u dhexeeya ganacsatada isgaadhsiinta, lana xidhiidha fulinta xeerkan, taas oo ay ku jirto:-

a) Diidmada isku-xidhka hoose, dhammaystirka heshiisyada iskuxidhka hoose iyo xaaladaha suurtagalin kara shebekad is gaadhsiineed.
b) Suurta galnimada iyo xaaladaha wada isticmaalka adeega guud ee jira ama hanti gaar ah.

c) Fullinta hab tilmaamaya qaybinta waajibaadka adeegga guud iyo qiimaynta faraqa adeegga iyo inta ku bixi karta.

**12)** Inay dejiyaan isla markaana meel mariyaan halbeegga iyo shuruudaha gaarka ah ee heshiis hoosaadka khadadka waayirada, qalabka aan waayirka lahayn, iyo xadhkaha badda hoos mara marka lagu daro qalabka isgaadhsiinta ee bar kulanka shebekedda isgaadhisiinta Guud.

**13)** Inay bixiyaan oggolaanshaha nooca qalabka isgaadhsiinta ee bar-kulanka, ee loogu talo galay isticmaalka qof ahaaneed iyo ka gaar ahaaneed ama isticmaalka meel gaar ah iyo illaalada meeshaas.

**14)** In ay diyaariyaan isla markaana fuliyaan qorshaha qaran ee lambarada, iyaga oo u gaar yeelaya ruqsadle kasta lambaro si waafaqsan qorshaha qaran ee Lambarada.

***15)*** Inay dib u eegaan cashuurta si ay u hubsadaan inay macquul tahay oo cadaalad ku dhisan tahay, dheeltirka qorshaha cashuuraha iyo talaabooyinka kale ee la xidhiidha maamulidda cashuuraha iyada oo ay ku jiraan ruqsadaha isgaadhsiintu ee kaabaya, hadday lagama maarmaan noqotana waxay xaddidayaan cashuurta ruqsadle ka bixiyo suuqa isgaadhsiinta ee dhiggiisa ah iyo qimaha ku kordhi kara adeegga isgaadhsiinta iyaga oo waxii laga bedelayo dib ugu celinaya Wasaaradda. *Waxaa xubintan ka soo talo bixinaya gudi ka kooban komishinka iyo Wasaarada Boosaha iyo wasaaradda Maaliyadda oo ay magacaabaan labada wasiir ,waxaana jidaynaya cashuurta Golaha Wakiilada marka ay sidaas ku qancaan.*

**16)** In ay qabtaan cabashada dadweynaha ee la xidhiidha adeegga guud, cashuurta, iyo cashuuraha laga qaado adeegga aan la hayn wax tartan ah.

**17)** In ay ganaaxaan shirkadaha mar kasta oo ay jebiyaan xeerka, ama xeer hoosaadyada sida iyada oo liisanka looga joojinaya si ku meel gaadh ah ama si rasmi ah ama lagu ganaaxo qaddar gaadhi kara 5% dakhliga shirkadda marka uu xadgudubku soo noqnoqdo. *Shirkadda tallaabadan laga qaaday waxaa u bannaan in ay cabasho qoraal ah u gudbiyaan*

*wasiirka si dhexdhexaadin uga galo arinka taagan hadii shirkadi ku qanci waydo dhexdhexaadinta wasiirka waxay shirkaddu dacwad u gudbin kartaa maxkamadda awooda u leh.*

**18)** Si ay u fuliyaan xilkooda Komishanku waxa uu mudnaanta siinayaa *xeerkan iyo* halbeegga caalamiga ah ee ugu wanaagsan maamulidda adeegga isgaadhsiinta, waxay meel marinayaan hab lagu ururinayo xogta, faalooyinka iyo talo bixinta shirkadaha iyo dhinacyada kale ee daneeya, hadday lagama maarman tahay waxay abuurayaan guddiyo talo bixineed.

**19)** In ay ururiyaan xogta la xidhiidha isgaadhsiinta si ay u soo saaraan war bixino, buug iyo qaab ay raacaan macaamiishu, waxay kale oo ay bulshada u diyaarinayaan barnaamijyo wacyigelineed kuwaas oo lagu barayo muhiimada isgaadhsiintu u leedahay horumarka dhaqan iyo dhaqaale ee Bulsho JSL.

**20)** In ay diyaariyaan warbixin sannadeedka wax qabadka Komishanka ee sannadka, guulaha ay xaqiijiyeen, dib-u-dhaca ku yimid iyo qorshahooda taagan iyo kan fog.

## Qodobka 6aad: Shuruudaha Xubnaha Komishanka

Waxaa komishanka Maamulaya Guddiga maamul oo ka dhexbaxaya Guddiga komishanka oo ay hogaaminayaan Guddoomiye, Guddoomiye xigeenka iyo Agaasime

1) Shuruudaha Qofka Xubin ka noqonaya komishanka:

a) Waa in uu ahaaddaa Muwaadin reer Somaliland ah.
b) Waa in Maskax ahaan iyo Jidh ahaanba guddan karaa waajibaadka shaqo
c) Waa in aanu Xubin ka ahayn golayaasha Qaranka
d) Waa in aanay maxkamadi ku xukumin dambi ciqaabeed wayn ama musuq lagu aqoon.
e) Waa in uu haystaa ugu yaraan shahaado dugsi sare, hadii aanu ahayn xirfadle si gaar ah xeerku u xusay.

2) Mudada xilku waa shan Sannadood oo mar la cusboonaysiin karo.

3) Mushaharka gunooyinka iyo xuquuqda kale ee maaliyadeed ee Gudoomiyaha iyo xubnaha kale ee golaha maamulka waxaa lagu cadaynayaa Xeer hoosaad uu yeelandoono Komishanku wasiirkuna wareegto gaar ah kusoo saari doono.

4) Haddii mid ka mid ah xubnaha ay/uu ka tago/tagto ama laga qaado amba geeriyi ku timaado, waxaa jagada banaanaatay loo maryaa

buuxinteeda, sidii loo magcaabay, iyada oo muddo bil gudeheed ah lagu soo buuxinayo xilkaas banaanaaday.

5) marka laga reebo xaaladaha xeerkani tilmaamayo oo lagu soosaarayo wareegto, ma'banaana in Xubinta Golalah maamulka laga qaado xilkeeda ka hor dhamaadka muddada Xafiiska.

6) Waxaa Xubinimada lagu waayi karaa:-
   a) Is casilaad
   b) Muddada oo dhamaata.
   c) Haddii dantiisa iyo tan komishanku iska hor yimaadaan sida xeerkani dhigayo lana cadeeyo.
   d) Hadu waayo mid ka mid ah shuruudaha xubinimada.
   e) Hadii uu galo dembi ka soo horjeeda dhexdhexaadnimadda komishanka cadayn sugana loo helo.
   f) Hadii uu u gudan Kari waayo waajibaadkiisa xubnimo dhibaato ka soo gaadhay jidh ahaan iyo maskax ahaanba dardeed.

## Qodabka 7aad: Xilka iyo awooda Gudidda

Guddiga Komishanku waxa uu qabanayaa dhammaan xilka komishanka sida ku cad xeerka, waxa uuna qaadan karaa go'aamada lagama maarmaanka u ah xaqiijinta ujeedoyinka Komishanka loo aasaasay, Guddigu si uu u guto waajibaadkiisa wuxuu isticmaalayaa dhammaan awoodiisa ku xusan xeerka ama xeer hoosaadyada gaarka ah.

1) Ansixinta saraakiisha Komishanka ka dib marka Agaasimaha guud soo magacaabo inta aan loo guddbin wasiirka.

2) Qeexidda himilada Komishanka iyo marinka loo marayo xaqiijinteeda .

3) In uu ansixiyo qorshaha Komishanka iyo shaqadeeda, si waafaqsan Siyaasadda guud ee Wasaaradda.
4) In uu kormeero oo qiimayo horumarka laga gaadhay istaraajiyada Komishanka iyo ujeedooyinka ay hiigsanayso.
5) In uu ansixiyo maamulka iyo qaab dhismeedka Komishanka una gudbiyaan wasiirka.
6) In uu xaqiijiyo meel marinta qorshaha Komishanka isaga oo dib u eegaya, qaab dhismeedka iyo qorshaha uu soo gudbinayo agaasimahu.

7) In uu u helo Komishanka ilo dhaqaale oo dabooli kara baahidooda iyo fullinta wajibaadkooda:-
   a) Ansixinta Miisaaniyad sannadeedka iyo xisaab xidhka.
   b) Ansixinta daymaha lagama maarmaanka ah si Komishanku u fuliyo Hawlihiisa.
   c) Ansixin wixii kharash ah ee ka baxsan Miisaaniyad sanadeedka.

d) Gudoomida hibooyinka iyo taburucaadka iyada oo la raacayo qaraarada iyo go'aamada udhigan ee la xidhiidha arintan loona gudbiyo wasiirka iyada oo la dhawrayo xeerka.
e) Ansixinta siyaasada maamulka shaqaalaha.
f) Ansixinta iyo kormeerada go'aanada komishanka, Mashruucyada, heshiisyada, adeega iyo Ruqsadaha.
g) Guddiga oo la shaqaynaya agaasimaha guud in la muujiyo aragtida Komishanka ee bulshada, iyo dhinacyada daneeya isla markaana kor loo qaado sumcada komishanka.
h) Guddoomiyaha ama xoghayaha Komishanku dib u eego tallooyinka agaasimaha guud usoo jeediyo si aragti midaysan loogu gudbiyo wasiirka .
i) Komishanku waxa uu awood u leeyahay inuu dhexdiisa ka magacabo gudi iyo inka badan , si u ugu igmado qayb ka mid ah waajibaadka gudiga, sidoo kale, Komishanku waxaa uu xaq u leeyahay inuu u igmado qaybo ka mid ah awoodihiisa Gudoomiyaha ama Agaasimaha Fulinta.
j) Kor u qaadidda sumcadda Komishanka ee dhinaca dhexdhexaadnimadda iyo wax-qabadka.

## Qodabka 8aad: Fadhiyada Guddiga

1) Guddida waxa uu kulmayaa labadii biloodba mar ugu yaraan, iyada oo Gudoomiyuhu isugu yeedhayo ama ku xigeenkiisu markuu maqanyahay.
2) Guddidu wuxu yeelan karaa fadhi aan caadi ahayn oo uu isugu yeedho Guddoomiyaha Gudigu ama ay ugu yaraan 3 xubnood oo komishinka ka tirsani ku soo jeediyaan qoraal sababaysan saxeexanna iyadoo guddoomiyuhuna 10 cisho gudahood isugu yeedhayo fadhi aan caadi ahayn. *Waxaa kale oo fadhi aan caddi ahayn soo jeedin kara Wasiirka oo isaguna qoraal sababaysan u gudbinaya gudoomiyaha gudidda.*
3) Shirka Guddidu waxa uu ku qabsoomayaa ugu yaraan afar xubnood, waana in Gudoomiyaha ama gudoomiye ku xigeenku joogaa.
4) Go'áanka Guddigu waxa uu ku ansaxayaa cod aqlabiyad ah, oo ah xubnaha jooga ee codeeyey. Marka ay codka xubnuhu isku tiro noqdaan waxaa codaynaya gudoomiyaha fadhiga.
5) *Xoghayaha gudidda oo noqonayaa xubin maamul oo komishanku iska dhex doorto wuxuu xilkiisana ka mid ah*, diyaarinta ajandaha shirarka, ururinta xogta fadhiyada Guddiga, ilaalinta qoraalada iyo waraaqaha, iyo hawl kasta oo Guddigu u xilsaaro.
6) Guddigu wax uu fadhiyadiisa ku Marti qaadi kara wasiirka iyo qof kasta oo ka soo qayb galkiisa uu u arko muhiim. Waxaana ka reeban qofkasta oo lagu Marti qaado fadhiga in uu codeeyo ama uu buuxiyo tirada fadhigu ku qabsoomayo.

## Cutubka 4aad: Xil-Gudashadda Komishanka

### Qoddobka 9aad: Qaab Dhismeedka Komishanka

Agaasimaha guud ayaa dejinaya qaabdhismeedka Komishanka isla markaan hordhigaya guddida waxaana ansixinaya Wasiirka.

### Qoddobka 10aad: Shaqaalaynta Shaqaalaha iyo Magdhawgooda

**1)** Komishanku waxa ay yeelanaysaa shaqaale ka hawl gala fullinta, kuwaas oo magacaabidooda, ama heshiisyadooda, gunooyinkooda, mushaharkooda, xuquuqdooda iyo waajibaadkooda lagu maamulidoono xeer hoosaadyada Wasaaraddu soo saarto.

**2)** Wasiirku isaga oo la tashanaaya Agaasimaha guud waxa uu qorayaa shaqaalaha iyo la taliyeyaasha Komishanka una gudbinayaa guddiga, si loo ogolaado iyada oo tixgelin lasiinayo miisaaniyad sanadeedka Komishanka ee wasaaradu usoo diyaariso si waafaqsan xeerkan. Iyadoo loo raacaayo xeerka Shaqaalaha dawlada.

### Qoddobka 11aad: Iska Hor imaadka Danaha

**1)** Waxaa ka reeban gollaha komishanka iyo shaqaalaha Komishanka inay si toos ah ama si dadban wax maslaxad maaliyadeed ah ugu yeeshaan shirkadaha isgaadhsiinta mudada ay xilka hayaan, mid kasta oo ka mid ahna waxaa ku waajib ah in u qoraal ku gaadhsiiyo Komishanka haddii uu wax maslaxad maaliyadeed ah ku yeesho isgaadhsiinta.

**2)** Agaasimaha guud iyo xubin kasta oo ah Komishanka marka ay xilka shaqada Komishanka bilaabayaan, waxay qorayaan caddayn ay ku muujinayaan:

- Dan kasta oo ay ogyihiin in ay ku leeyihin shirkadaha isgaadhsiinta mid toos ah iyo mid dadbanba.

**3)** Wasiirku wuxu meesha ka saari karaa dan kasta oo caadi ah ama an mudnaan lahayn (non mate rid) oo gollaha ama mid ka mid ah shaqaaluhu ku leeyahay shirkadaha isgaadhsiinta, taas oo aan ka hor imanayn

**4)** shurudaha xilka xafiiska uu hayo, Wasiirkuna waxa uu soo saaraya go'aan sababaysan oo la xidhiidha oggolaanshaha dantaa.

**5)** Wasiirku marka uu ka go'aan gaadhayo baaxadda danta gaarka ah oo Agaasimaha guud ama mid ka mida xubnaha Komishanku ku leeyahay shirkadaha isgaadhsiinta oo laga yaabo in ay ka hor timaado danta Komishanka waxa uu maanka ku haynayaa:-

  **a)** Baaxada iyo saamaynta ku leedahay danta dhaqaale ee shirkada uu ku leeyahay Agaaasimaha guud ama xubnaha gollaha.

b) Inta ay le'eg tahay, Heerka ay gaadhsiisan tahay iyo kaalinta Komishanku ku leeyahay shaqada shirkada Agaasimaha guud ama xubnahu danta ku leeyahiin.
c) Iyo fekerka dadku ka qaadan karo danta gaarka ah ee xubintu ku leedahay shirkadda.

## Qoddobka 12aad:

## Ilaalinta Sirta Shaqada

Waxaa ka reeban golaha iyo shaqaalaha komishanka bixinta xog kasta oo ay si toos ah ama si dadban ugu ogaadaan intay shaqada hayaan, waajibkani **qofka waa saarnaanayaa xataa haduu shaqadda ka tago**

## CUTUBKA 5AAD: MAALIYADDA IYO WIXII LA XIDHIIDHA

## Qoddobka 13aad: Xisaabaadka iyo Hanti Dhawrka

1) Sannad maaliyadeedka Komishanku waxa uu ka bilaabmayaa bilawga bisha January ee taariikhda miilaadiga wuxuna dhammaanaya 31 December ee sanadkaa.

2) Komishanku waxaa uu yeelanayaa sannad walba miisaaniyad u gaar ah.

3) Miisaaniyadda gaarka ah ee Komishanka iyo lambarkeeda xisaabta (Financial account) waxaa gudbinaya Wasiirka Wasaaradda isaga oo ka ansaxin doona hay'adaha ay khusayso.

4) Agaasimaha guud isaga oo la tashanaya golaha waxa uu diyaar garaynayaa Miisaaniyad sannadeedka , waxaana loo gudbinayaa Wasiirka odoroska miisaaniyad sanadeedka dambe 3 bilood ka hor dhammaadka sannad maaliyadeedka.

5) Wasiirku waxa uu bilawga sannad maaliyadeed kasta magcaabayaa hanti dhawr madax banaan oo hubiya qaab xisaabeedka iyo lambarka xisaabta ee Komishanka. *Wuxuu kaloo adeegsan karaa hanti dhawrka guud ee dalka.*

6) Agaasimaha guud wuxu diyaarinayaa war bixin xisaabeed la mid ah ta Hantidhawrka wuxuna ku lifaaqayaa lambarada xisaabta iyo war bixinta hanti-dhawrka isla markaasna siinaya nuqul guddiga.

## Qoddobka 14aad: Maaliyadda Komishanka

**1)** Ilaha Maaliyadda Komishanku waxay ka koobnaanayaan:-
   **a)** Dakhliga ka soo xerooda codsiyada cusboonaysiinta Ruqsadaha.
   **b)** Ganaaxyada laga qaado ruqsadlayaasha iyada oo lagu jaangoynayo ruqsadaha la bixiyey oo ay ku jiraan kuwa gaarka ah iyo kuwa guud (indivitual and class licenses).
   **c)** Cashuurta laga qaado adeegga u bixiyo Komishanku.
   **d)** Ganaaxyada uu xeerkani jideeyey.
   **e)** Kaalmo uu Komishanku helo isla markaana Wasiirku oggolaaday.
   **f)** Kaalmada looga qoondeeyey miisaaniyada guud ee dalka.
   **g)** Ilo kasta oo Wasiirku ansixiyo.

**2)** Kordhin kasta oo lagu sameeyo khidmadda adeegga waxaa ansixinaya wasiirka, *hadduu diido Wasiirku kordhinta wuxuu ku soo saarayaa qoraal sababaysan oo uu ku caddaynayo is hortaagiisa. waxaana shardi ah in kordhinta khidmadaha iyo takaaliifta kale la horgeeyo oo uu Golaha Wakiiladu ogolaado.*

**3)** Shaqada iyo hawlaha waxaa laga maalgelinayaa sannadka hore miisaaniyada guud ee qaranka iyada oo lagu talo gelayo in shaqada Komishanka laga maalgelin doono cashuuraha lagu xusay faqrada 1aad ee qoddobkan, haddii aanay ku filayna waxaa la dabaqayaa faqrada soo socota.

**4)** Komishanku iyaga oo kaashanaya Wasaaradda waxaay wasiirka maaliyadda u gudbinayaan codsi ay ku dalbanayaan in laga kaabo khasnadda Qaranka si ay u daboosho dhimaalka miisaaniyadda.

## Qoddobka 15aad: Kharashka

Komishanku waxa ay siticmaalayaan miisaaniyadooda si xeerkan waafaqsan si ay u maalgeliyaan hawlahooda oo ay ku jiraan;

**1)** Kharashka maamulka iyo socodsiinta hawlaha Komishanka.

**2)** Bixinta Mushahaarooyinka, Gunooyinka, habeen-dhaxyada, Ciidaha iyo xuquuqda shaqo ee shaqaalaha.

**3)** Wax kasta oo lagamaa maarmaan u ah dardar gelinta iyo tayaynta xil gudashada (waajib gudashada) Hay'adda ha ahaadeen hanti guurto iyo mid ma guurto ah, iyo waxa kasta oo ah Rasamaalka hay'ada.

**4)** Wax kasta oo lagama maarman u ah dhawrista hantida Wasaaradda/Komishanka (guurto iyo ma guurto).

5) Bixinta kharashaadka lagama maarmanka u ah gudashada waajibaadka Komishanka ee xeerkani tilmaamay.

6) Hadhaaga miisaaniyada la ansixiyey ee Komishanka waxaa lagu wareejinayaa khasnadda dawladda bil gudaheed marka hantidhawrku dhammeeyo xisaabta, lambarka xisaabta socota ee Komishanka si xeerkan waafaqsan.

# CUTUBKA 6aad: RUQSADA

## Qoddobka 16aad: Shuruudaha Guud

1) Qofna ma aasaasi karo, mana maamuli karo shabakad isgaaddhsiineed, ama ka ganacsan karo adeegga guud ee isgaadhsiinta ee Somaliland haddii aan loo qaadan Ruqsad si waafaqsan xeerkan.

2) Qofna oggolaansho la'aan ma xidhi karo shebekadaha isgaadhsiineed ama nooc kasta oo qalab isgaadhsiineed, haddii aan loo oggolaan si xeerkan waafaqsan.

3) Qofna kama hirgelin karo habka dib ula soo hadalka Somaliland gudaheeda hadaanu ogolanshiiyo u haysan

## Qoddobka 17aad: Shebekadda is gaadhsiinta gaarka ah

1) Waxaa la aasaasi karaa amba la hawlgelin karaa Shebekedda Isgaadhsiinta gaarka ah iyada oo Ruqsad laga qaadanayo Komishanka, marka laga reebo kuwa isticmaalka hirarka raadyaha ee loo sharciyey Ruqsada sida ku xusan Cutubka 6aad ee xeerkan.

2) Waxaa la isku xidhi karaa Shebekedaha Isgaadhsinta gaarka ah, waxaa kaloo lagu xidhi karaa shebekedda isgaadhsiinta guud, ka dib marka la gaadho heshiis qoran oo dhex mara dhinacyada ay khusayso, kaas oo waafaqsan tusaalaha iyo tilmaamaha Komishanka oo caddaynaya shuruudaha iyo qaabka farsamo ee isku xidhku ku hirgelayo, hadday lagama maarmaan noqoto noocyo gaar ah oo is ku xidhkaas ah waxaa loo dalban karaa oggolaanshiiyaha Komishanka.

3) Qofka leh, ama hawlgeliya ama maamula isgaadhsiin gaar ah u ma bannaana in uu bixiyo adeegga isgaadhsiinta guud.

## Qoddobka 18aad: Bixinta Ruqsada isgaadhsiinta

1) Ruqsadda loo qaadanayo maamulidda shebekedaha isgaadhsiinta guud ama adeegga isgaadhsiinta guud hadday yihiin kuwo qof gaar ah ama

kuwo guud waxa Komishanku u xaddidi karaa xilli go'an iyada oo xeerka la raacayo.

**2)** Ruqsadda loo bixiyey si xeerkan waafaqsani waxba ka bedelimayso ruqsad kale ama waajib kale ama xaalad kale oo lagu mutaystay xeer kale

## Qoddobka 19aad: Shurudaha La Xidhiidha Ruqsadda Gaarka Ah Iyo Ruqsad Guud

**1)** Codsadaha Ruqsad waxa laga rabaa in uu yahay shirkad sharci ah oo wadani ah, ama laan shirkad ajnebi ah oo haysata Ruqsad ay kaga hawlgasho Somaliland si wafaqsan xeerka Ganacsiga.

**2)** Si loo bixiyo Ruqsad waxa shardi ah in dhammaan agabka iyo shaqaalaha adeeggu ay deggan yihiin Somaliland, Komishankuna waxa uu awood u leeyahay in uu ka tanaasulo shuruudahaa marka uu ka ansaxiyo Wasaaradda loona arko in ay jirto baahi dalku u qabo adeeggaas isgaadhsiineed oo aan laga heli Karin dalka gudihiisa, iyada oo la eegayo tayada, waxaase u shardi ah in cidda sida tooska ah uga faa'iidaysanaysa adeegaas ay noqoto macaamiisha iyada oo Komishanku kaga go'aan qaadanayo shuruudaha ku xusan ruqsada.

## Qoddobka 20: Gudbinta Dalabka Ruqsada

**1)** Qoraal ku socda Komishanka, ogeysiinna uu ku leeyahay Wasiirku ayaa lagu dalbanayaa arjiga codsiga Ruqsadda isgaadhsiinta. Arijiga waxaa lagu lifaaqayaa xogta iyo cadaymaha sugaya xogta dhammaystiran ee codsadaha iyada oo ka hor la soo bixinayo cashuurta codsiga ruqsadda sida xeerku u dhigayo. Komishanka waxa ay ku warcelinayaan 15 maalmood gudahood marka laga soo tiriyo maalinta si rasmi ah codsigu u xerooday.

**2)** Komishanku waxay ku war gelinaysaa codsadaha, haddii aanay aqbalin codsigiisa go'aan sababaysan oo faah-faahsan.

## Qoddobka 21aad: Nuxurka Xogta Ruqsada

**1)** Ruqsada Isgaadhsiintu kuma wareegi karto cid aan la siin, haddii aan oggolaansho qoraal ah laga helin Komishanka.

**2)** Ruqsadda Komishanku bixiyo waxa ay ku soo baxaysaa qoraal haddii aan xeerku wax ka bedelin waxayna dhaqan gal ahaanaysaa mudada lagu xaddiday ee ku xusan.

**3)** Ruqsada isgaadhsiinta waa in ay ku jirtaa:

   **a)** Shuruudaha Komishanku u arko lagama maarmaan ee suuro galka ah.

   **b)** Arrimaha looga baahan yahay Ruqsadluhu in uu u gudbiyo Komishanka, iyada oo la dhawrayo xaaladaha iyo xilliga loo qabtay sida waraaqo rasmi ah, xogta lambarka xisaabta, iyo xogta kale ee Komishanku dalbado si uu u gutto waajibaadkooda si xeerka waafaqsan.

## Qodobka 22: Bixinta Ruqsadaha Gaarka ah

**1)** Ruqsadha gaarka ah waxa la bixin karaa marka Agaasimaha guud ka talo bixiyo isla markaana Wasiirku oggolaado 30 maalmood gudahood marka agaasimaha guud soo gudbiyo talo bixintiisa.

**2)** Haddii Wasiirku diido bixinta ruqsadda gaarka ah ama mudadii warcelintu dhammaato iyada oo aan Wasiirku ka go'aan gaadhin, agaasimaha guud waxa uu dib ugu soo gudbin karaa Wasiirka 30 maalmood gudahood si go'aan Kama dambays ah Wasiirku uga gaadho dib u soo celinta.

**3)** Mar kasta oo Wasiirku diido talo bixinta komishanka waxa uu sababeynayaa go'aankiisa si loogu qanciyo codsadaha.

**4)** Komishanku inta aanay codsiyada ruqsadda gaarka ka go'aan gaadhin, waxa la hubinayaa in codsaduhu soo buuxiyey shuruudaha xeerka, xeer hoosaadyada iyo go'aamada maamul ee la soo saaray si xeerkan loo dhaqan geliyo iyada oo si gaara loo hubinayo:-

   **a)** In codsaduhu buuxiyey halbeegga xeer ee lagu codsanayo ruqsada kaas oo Komishanku dejinayo.

   **b)** In uu qaban karo adeegga macaamiisha iyada oo lagu salaynayo heerka ugu hooseeya ee halbeeggaa heer caalami.

   **c)** In u tartan xor ah u galay kuna guulaystay.

**5)** Komishanku waxa uu 100 maalmood gudahood kaga go'aan gaadhayaa codsiga, haddii loo baahdo xog dheeraad ahna waxa laga dalbanayaa codsadaha, iyada oo sidaa ku war gelinaysa codsadaha mudo aan ka badnayn 30 maalmood gudahood oo ka bilaabanta taariikhda la qabtay codsiga, go'aanka kama dambaysta ahna wuxuu ku soo baxayaa marka laysu eego mudada dheer:

   **a)** 30 maalmood oo ka bilaabanta marka uu soo gudbiyey xogta dheeradka ah ama

   **b)** 160 maalmood gudahood oo ka bilaabanta Taarikhdii codsiga.

**6)** Ruqsadda gaarka ah waa in la xaddido heerkeeda, sida ugu suurta galsan haddii farqi yimaadana waa in la sababeeyaa.

**7)** Iyada oo aan lagu xadgudbin qoddobkan, Komishanku iyaga oo ka ansaxinaya Wasiirka waxa uu Ruqsad siin karaa codsadaha aan lahayn saylad weyn taas oo uga dabacsan marka la barbardhigo kuwa saylada weyn leh.

**8)** Toddoba maalmood gudahood xilliga ruqsadda la bixiyey, waa in lagu war geliyaa ruqsadlaha in uu guddoomo ruqsadiisa, iyada oo loo marayo qaabka loola xidhiidhi karo taasoo ku cad codsiga.

## Qoddobka 23aad: Cusboonaysiinta Ruqsadda Gaarka ah

**1)** Iyada oo aan la khilafayn faqradda (2aad) ee qoddobkan, Ruqsadaha gaarka ah ee u soo baxay si xeerkani waafaqsan waxa loo cusboonaysiin doonaa marka ruqsadluhu sidaa codsado.

**2)** Komishanku waxa uu diidi karaa cusboonaysinta ruqsadda hadday u caddaato in ruqsadluhu jebiyey shuruudaha ruqsadda, haddii talaabo sharciga ah laga qaaday iyo haddii kaleba si uu ugu hogaansamo xeerka.

**3)** Komishanku go'aanka diidmada cusboonaysiinta Ruqsadda waxa uu ruqsadlaha ku wargelinayaa sannad ka hor inta aanay ka dhicin ruqsaddu iyada oo qoraal loogu wargelinayo xadgudubka uu ku mutaystay in ruqsadda laga joojiyo ka dib marka laga ansaxiyo Wasiirka.

**4)** Waa in Komishanku mar labaad tixgeliyo jawaabta ruqsadlaha inta aan Ruqsaddu ka dhicin iyo ka hor inta aan tallaabada laga qaadin.

## Qodabka 24aad: Cusboonaysiinta iyo la Noqoshada Ruqsadaha Gaarka ah

Komishanku waxa ay wax ka bedel ku samayn karaan, lana noqon karaan Ruqsadda gaarka ah marka ay jiraan xaaladahani:-

**1)** Marka uu iskiis u oggolaado ruqsadluhu
**2)** Iyada oo la cuskanayo jebinta shuruudaha ku cad Ruqsadda
**3)** Marka cusboonaysiinta iyo la noqoshada Ruqsaddu waafaqsan tahay QOd 36aad ee sharciga la xidhiidha xaqiijinta Ruqsadda gaarka ah.

## Qoddobka 25aad: Bixinta Ruqsada Guud

Ruqsada maamulida shebekedda isgaadhsiinta guud ama qoddobada la xidhiidha adeegga isgaadhsiinta guud waxa loo bixinayaa habka Ruqsad qaadashada guud marka laga reebo Ruqsadaha lagu xidhay wax yaabaha soo socda ee ruqsadlaha gaarka ahi u baahan yahay:

**1)** Isticmaalida mawjada radyawga, ama

**2)** Isticmaalka lambar telefoonada iyada oo la raacayo qorshaha qaranka ee lambarada.

**3)** Adeegyada soo socodda:

- **a)** Adeega isgaadhsiinta ee wareega.(mobile telecommunications)
- **b)** Shabakedda humaaga ah ee adeega wareega. ( mobile virtual network operators)
- **c)** Qalabka Vsat
- **d)** Lambar tuse (paging).
- **e)** Oggolaashaha isticmaalka adeegga radiyo moobaylka.( public access mobile radio services)
- **f)** Adeegga isgaadhsiinta maguurtadda ah ee qaran.( national fixed services)
- **g)** Adeegsiga goobaha caalamiga ah (International facilities)
- **h)** Adeegyadda caalamiga ah ( international services)
- **i)** Isweydaarsiga internetka ( internet exchange)

**4)** Liisanka guud waxa la siinayaa codsadaha marka uu buuxiyo shuruudaha Komishanku u dhigay xilliba xilliga uu ka dambeeyo, iyada oo Komishanku ka dalban karo xog dheeraad ah.

**5)** Waxay Komishanku diyaarinayaan foomka codsiyada Ruqsadaha isgaadhsiinta kaas oo loo daabici doono habka Komishanku u garato in uu baraarujin karo dareenka qofka danaynaya.

## Qoddobka 26aad: Cusboonaysiinta liisanka guud

Cusboonaysiinta liisanka guud waxa loo marayaa habka loo maray liisanka gaarka ah ee ku xusan Qod. 22aad.

## Qoddobka: 27aad: Kala noqoshada iyo wax ka bededlka Ruqsadda guud

1) Komishanku waxa uu wax ka bedeli karaa amaba meesha ka saari karaa shuruudaha liisanka guud, waxase ku waajib ah inta aanay ku dhaqaaqin wax ka bedelidda ama laalidda liisanka guud, in ay ku wargeliso ruqsadlayaasha wax ka bedelka ama laalidda 30 cisho ka hor iyada oo lagu gaadhsiinayo qoraal.

2) Waa in ogaysiinta wax ka bedelka ama laalidda lagu cadeeyo:-
   a) In Komishanku qorsheynayo wax ka bedelka, ama laalida nooca ruqsadaha iyo raadka ka dhalan kara laalida ama wax ka bedelka.
   b) Sababta loo laalayo ama wax looga bedelayo.
   c) In ruqsadlaha guud mudada ogeysiinta ku soo gudbin karo jawaabtiisa

3) Marka la derso jawaabta ruqsadlaha, waxa Komishanku soo saarayaa go'aan munaasib ah oo qoraal ahaan gacanta laga saaraya ruqsadlayaasha iyo ciddii kale ee danaynaysa.

## Qoddobka 28aad: Xaqiijinta dhaqan gelinta ruqsadaha guud iyo kuwa gaarka ah.

1) Komishanku Haddii ay u caddaato in Ruqsadalahu jebiyey xeerka ama shurudaha Ruqsadda ama ay jiraan caddaymo tilmaamaya in Ruqsadluhu fulinayo adeeg aanu ruqsad u haysan markaa iyada oo la raacayo faqradaha (2aad) (3aad) (4aad) ee qoddobkan Komishanku waxa uu amrayaa tallabooyinka ay lagama maarmaan u arkaan si loo xaqiijiyo dhaqan gelinta xeerkan iyo shuruudaha Ruqsadda, iyada oo nuqul amarka ah loo dirayo Ruqadlaha.

2) Inta aan Komishanku amarka bixin waxaa ruqsadlaha la siinayaa qoraal ogaysiin ah oo ay ku xusayaan:-
   a) amarka la soo saarayo iyo raadkiisa
   b) Jebinta shuruudaha Ruqsadda ee Ruqsadluhu ku kacay iyo sida ay Komishanku u arkaan in loo jebiyay shuruudaha ama tilmaamaha iyo sababaha ku qanciyey in uu ku xadgudbay jebinta xeerka iyo shuuurdaha Ruqsada.

c) Ruqsadluhu wuxu qoraalka kaga soo jawaabi karaa 30 maalmood gudahood marka ay soo gaadho ogaysiinta Komishanka.

3) Waxay Komishanku tixgelinayaan jawaab kasta oo qoraal ah oo loo soo gudbiyey mudada loo qabtay.

**4)** Haddii Ruqsadluhu mudada gudaheeda ku soo jawaabi waayo waxaa Komishanku soo saarayaa amar ka kooban:-

**a)** talaabooyinka la farayo ama lagu reebayo qabashadooda, oo lagu xaddidayo amarka, iyo in uu ka hortago ama aqballo jiritaanka jebinta lagu xusay xubinta (2aad)

**b)** Inay ku soo rogto Ruqsadlaha ganaax lacageed iyada oo la' eegayo duruufaha, Lana sababaynayo, isla markana la tixgelinayo kala soocid la'aanta Ruqsadalayasha.

**c)** Inay siiso ruqsadlaha digniin, haddii ruqsadlahu ka baaqdo bixinta ganaaxa ama ku dhaqmi waayo tilmaamaha Komishanka markaa waxa laga la noqonayaa ruqsadda.

**5)** Marka Ruqsadluhu raaci waayo tallaabooyinka la faray ama uu bixin waayo ganaax lagu soo sheegay faqrada hore muddada loo qabtay gudaheeda, Komishanku waxa uu laalayaa Ruqsada iyada oo Ruqsadlaha la socodsiinaysa.

## Qoddobka 29aad: Laalidda iyo Cusboonaysiin La'aanta Ruqsadda iyo Raadka ka dhalan Kara.

**1)** Laalidda iyo cusboonaysiin la'aanta Ruqsada waxa ka dhalanaya in la tirtiro dhammaan xaquuqdii iyo waajibaadkii Ruqsadlaha ee uu ku mutaystay Ruqsadda laga bilaabo taariikhda la laalay ama uu dhacay wakhtigii Ruqsaddu, hadba sida ay tahay.

**2)** Ruqsadlaha waxaa ka reeban aqbalidda macaamiil cusub laga bilaabo maalinta la gaadhsiiyo ogaysiinta, ama maalintii loo diiday cusboonaysiinta, waxase uu sii wadi karaa hawlaha lagama maarmanka u ah sidii uu macaamiishiisa ugu wareejin lahaa Ruqsadle kale kadib marka Komishanku qoraal ku ansixiyaan.

**3)** Ruqsdlaha la laalay Ruqsadiisa, wuxu Ruqsad dambe codsan karaa laba sano ka dib marka laga soo bilaabo maalinta Ruqsadiisa la laalay.

**4)** Cid kasta oo khasaare ka soo gaadhey laalista Ruqsadda waxa ay xaq u leedahay inay ku dacwayso ruqsadlaha wixii khasaare ah ee arintaa ka soo gaadhay, ama uu dib ugu celiyo khidmmadii adeegga ee laga qaaday.

# CUTUBKA 7aad:OGOLAANSHAHA QALABKA

## Qoddobka 30aad: Ogolaanshaha qalabka is gaadhsiinta.

**1)** Komishanku waxa ay dejinayaan tixraaca iyo qeexidda farsamo oo lagu xaddidayo halbeegga lagu dabaqayo qalabka isgaadhsiinta iyo qalabka isgaadhsiinta ee barkulanka si loo xakameeyo waxyeelada qalabku uu u ku keeni karo shabakadaha isgaadhsiinta iyada oo laga eegayo dhinacyada nabadgelyada, ammaanka, caafimaadka iyo deegaanka.

**2)** Qof kasta oo bixiya adeegga isgaadhsiinta amaba iibiya qalabka isgaadhsiinta waxa ka mamnuuc ah in uu isticmaalo, qaybiyo, iibiyo qalabka kasta oo isgaadhsiineed kaas oo tayadiisu ka hoosayso halbeega iyo shuruudaha qalabka farsamada ee xeerkani tilmaamayo.

**3)** Qalabka Isgaadhsiineed waxa ansixinaya Komishanka si loogu xidho shabakada isgaadhsiinta iyada oo loo marayo:

- **a)** xeer hoosaad loo soo saaray si waafaqsan xeerkan ama
- **b)** Shahaado Komishanku ku oggolaanayo iyada oo faahfaahinta loo soo gudbinayo Komishanka ka hor inta aan qalabka la dalban.

**4)** Xeer hoosaadka loo baahan yahay in la soo saaro ama shahaadooyinka la soo saarayo waa in ay xaqaajiyaan ku dhaqanka halbeegga farsamo ee lagu soo saaro si wafaqsan heer caalami oo ay dejinayaan cidda Wasaaraduu/Komishanku u igmado xilliba xilliga uu ka dambeeyo.

**5)** Qof kasta oo shahaado u dalbanaya si waafaqsan faqrada (3aad) ee qoddobkan waxa Komishanku farayaa in uu raaco shuruudaha isla markaana uu bixiyo khidmadda loo qorsheeyay adeegga.

**6)** Komishanku waxa uu soo saarayaa hab sheegaya shuruudaha iyo qaabka loo ansixinayo ee lagama maarmanka u ah in qalab isgaadhsiineed dalka la soo geliyo, ama qalabka isgaadhsiinta bar kulanka, isticmaalka, iyo iibintiisa.

**7)** Samaynta qalab kasta oo isgaadhsiineed oo loogu talo galay in lagaga ganacsado Soomaliland waa in uu waafaqsan yahay halbeegga loo ansaxiyay.

**8)** Ansixinta waxaa lagu xadidi karaa shuruudaha taasi oo Ruqsadlaha, soo saaraha, ama qaybiyaha laga rabo in ay raacaan si ansixintu dhaqan gal u noqoto.

**9)** Komishanku waxa uu awood u leeyahay haddii uu u arko munaasib, in uu la noqdo ansixinta ama wax ka bedelo oggolaanshaha lagu mutaystay

Qodobkan, iyada oo marka hore lagu wargelinayo Ruqsadlaha wax ka bedelka ama la noqoshada.

**10)** Soo dejiyaha ama qof kasta oo doonaya in uu soo rogo, qalab isgaadhsiineed oo aan weli tilmaamihiisa gaarka ah la xaddidin, waxa uu la soo xidhiidhaya Komishanka isaga oo soo gudbinaya faahfaahinta farsamo ee qalabka isaga oo ka codsanayaa Komishanka oggolaansho hordhaca ah oo u ku soo dejin karo qalabka.

## CUTUBKA 8aad: MAAMULKA MAWJADAHA IDAACADAHA IYO ADEEGSIGOODA

### Qoddobka 31aad: Maamulidda Mawjadaha Raadyaha

**1)** Mawjadaha idaacadahu waa ilo dabiiciya oo xaddidan, isticmaalkoodana waxaa maamulaya Komishanka si xeerkan waafaqsan.

**2)** Komishanku waxa ay masuul ka yahiin dhammaan mawjadaha, iyaga oo la tashanaysa Wasaaradda.

**3)** Komishanku waxa uu u xilsaaran yahay diyaarinta iyo horumarinta Jaantuska Mawjadaha ee Somaliland (Somaliland National table of frequency) loo qoondeeyey & diiwaangelinta daruuriga ah si loo fuliyo waajibaadka uu xeerkani sheegayo.

**4)** Iyada oo aan laga baxayn jaantuska mawjadaha qoondaysan ee Somaliland, Komishanku waxa uu masuul ka yahay isku xidhka, xaddaynta, Ilaalinta iyo fulinta hirarka isgaadhsiinta.

**5)** Habka loo maray xaddidaada hirarka, waxa uu noqon doonaa mid leh hadaf aan qarsoonayn, waqti iyo waliba takoorid la'aan aan cidna la fogeynayn.

**6)** Isticmaalka ku saabsan qaybta madaniga ee mawjadaha waxaa loo heli doonaa si caam ah.

### Qoddobka 32aad: Ruqsadda loo isticmaalo siyaabo kala duwan

**1)** Qofna kuma isticmaali karo SomaliLand gudaheeda shebakadda isgaadhsiinta iyada oo la isticmaalayo mawjadaha raadyaha ama kuma shaqayn karo/ isticmaali karo qalabka raadyaha oo la isugu geeyo shabakad ahaan, iyada oo aan la haysan ama laga helin Komishanka ruqsad.

**2)** Iyada oo la raacayo xubinta saddexaad ee qodobkan qofna ma isticmaali karo mawjadaha danabaysan ee ka hooseeya 3000 GHZ isla markaana hawada laguma sii dayn karo haddaanu helin ruqsad waafaqsan shuruudaha uu Komishanku u dajiyay.

**3)** Ciidanka Qaranka Somaliland, Ciidanka Ammaanka (Booliska), Ciidanka Asluubta, Hay'ada dekedaha iyo waaxda duulimadka rayidka ah iyaga oo la xidhiidhaya Komishanka waxa ay xaq u leeyihiin isticmaalka mawjadaha raadyawga, ee loogu talo galay adeegooda, waxaase ka reeban in ay farageliyaan mawjadaha kale.

**4)** Ciidanka Qaranka Somaliland, Ciidanka Amaanka(Booliska), Ciidanka Asluubta, waxay isticmaali karaan mawjadaha raadiyaha hadii Komishanku u oggolaado, waxaase shardi ah in ay u qataan ruqsad la mid ah ta ruqsadlayaasha kale.

**5)** Iyada oo aan loo eegayn xeerarka kale ee shirkadadaha adeegga warfaafinta ka dalbanaya ruqsadda, shirkadaha sameeya adeegyada ay ku jiraan adeegga raadiyaha, muqaalka (TVga), isgaadhsinta dayaxgacmeedka, iyo qalabka qabta, waxaa ku waajib ah in ay ruqsad u qaataan hirarka Komishanku qoondeeyay.

**6)** Gaadiidka badda ee ku soo xidha dekedaha Somaaliland, Gaadiidka cirka ee soo caga dhigta Garoomada Diyaaradaha ee Somaliland waxaa ka mamnuuc ah in ay u isticmaalaan saldhigooda wax ka baxsan, ujeedooyinka badda ama safaradda hawada (navigation), gurmadka, iyo gurmadka deg-dega ah, hadaanay Komishanka ka helin Ruqsad mawjadeed.

**7)** Gaadiidka dhulka ee shisheeyuhu leeyihiin uma isticmaali karo saldhig idaacad dalka gudihiisa, haddaan marka hore Komishanka oggolaansho laga helin.

**8)** Komishanku markii uu xog ka helo Ciidanka Qaranka, Ciidanka Amaanka, Ciidanka Asluubta, Hay'adda Dekedaha iyo waaxda Duulimaadyada Rayidka ah ee Somaliland waxay awood u leeyahiin inay joojiyaan Ruqsadda noocyo gaar ah oo ah qalabka idaacadaha in ruqsad loo qaato si loogu isticmaalo idaacadaha, waxayna soo bandhigayaan qalabka iyo tilmaamaha u gaarka ah

## Qoddobka 33aad: Gacan ku haynta saldhigga raadiyaha iyo maamulkooda

**1)** Iyada oo la raacayo, waxyaalaha laga reebay ee ku xusan faqrada (6aad), Qod. 42aad iyo faqrada 2aad iy 3aad ee qoddobkan, saldhigga Raadiyaha laguma haysan karo, lagumana isticmaali karo xuduudaha

juquraafi ee dalka Somaaliland ama maraakiibta iyo diyaaraddaha ka diwaan gashan Somaaliland, ilaa loo helo oggolaanshiiyo si xeerka waafaqsan; ama lalama soo gali karo saldhiga raadyow wadanka, haddaan Komishanku oggolaan.

**2)** Ciidanka qaranka iyo laamaha ammaanka ee Somaaliland lagu ma dabaqiyo xubinta 1aad ee qoddobkan.

**3)** Komishanku waxay xaq u leeyahiin in ay ka soo reebto xubinta 1aad ee qoddobkan dhinacyadda soo socda:

- **a)** Gaadiidka cirka, badda, dhulka iyo adeegda ka gudbaya xuduudaha juquraafi ee cirka, bada, iyo dhulka ama soo caga dhiganaya garoomadda iyo dekaddaha Somaliland.
- **b)** Safaaradaha ajanabiga ah ee dlka ku sugan ee Somaaliland ay ka dhaxayso macaamilo isku dhiganta iyo kuwa haysta oggolaanshaha la cusboonaysiiyo.

## Qoddobka 34aad: Bixinta Ruqsadda Hirarka

**1)** Codsiga ruqsadda hirarku wuxuu noqonayaa qoraal lagu socodsiinayo Komishanka iyada oo la buuxinayo foomka loogu tala galay, isla markaana lagu lifaaqayo wixii xog iyo caddaymo ah ee muujinaya in la bixiyey khidmaddii codsiga si xeerka waafaqsan.

**2)** Komishanku waxay codsiyada kaga soo jawaabayaan muddo 15 maalmood gudahood ah marka laga soo bilaabo maalinta codsigu soo gaadhay.

**3)** Waxay Komishanku xaq u leeyahiin in ay dalbadaan xog dheeraad ah oo kaabi karta codsiga. Xogtaas oo ay ku jirto ujeedada loo aasaasayo saldhigga idaacadaha, xarunteeda, nooceeda, tilmaamaheeda iyo sifooyinka gaarka ah ee qalabka loo isticmaalayo idaacadda.

**4)** Komishanku 30 maalmood gudahood oo ka bilaanta maalinta codsiga loo soo gubiyo waxa ay ka go'aan gaadhayaan in ay Ruqsadda bixiyaan iyo in kale, haddii loo baahdo xog dheeraad ah waxay ku ogaysiinaysaa codsadaha 15 maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta qabashada codsiga xogta dheeraadka ah ee ay uga baahan yahiin codsadaha, waxayna go'aan kama dambays ah ku siinaysaa:

- **a)** shan iyo Toban casho ka dib marka uu soo gudbiyo xogtaa ama
- **b)** 120 maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta u keenay codsiga.

**5)** Komishanku inta aanay soo saarin go'aanka codsiga Ruqsadda, waxay hubinaysaa in la buuxiyay dhammaan shuruudihii xeerkan, ama xeer

kale, ama xeer hoosaadyo ama go'aamo lagu meel marinayo xeerarkan oo la xidhiidha codsiga iyaga oo tixgelinaya:-

- **a)** Sida ay suurta gal u tahay in la helo hirarka isgaadhsiineed iyo in meel loo qoondayn karo saldhigga raadiyaha.
- **b)** In go'aanka la soo saaray ee codsiga ruqsadluhu ka hor imanayn, jaantuska mawjaddaha la qoondeeyay ee Soomaliland.
- **c)** Qoddobadda la xidhiidha tartanka xeerkan uu dhigayo.
- **d)** Xaqiijinta tayada iyo aqoonta loo isticmaalayo mawjaddaha idaacadda.
- **e)** Buuxinta shuruudaha ciidanka qaranka iyo hay'daha nabadgaliyadda.
- **f)** Iyo wax kasta oo la xidhiidha mawjaddaha isgaadhsiinta.

**6)** Haddii Komishanku diido bixinta Ruqsadda mawjada, waxay gaadhsiinayaan codsadaha go'aanka Komishanka oo sababaysan.

**7)** Oggolaanshaha Ruqsadda ee waafaqsan faqradaha qoddobkani waxba u dhimmayaan Ruqsad loo oggolaaday ama lagu bixiyey xeer kale.

**8)** Ruqsadda mawjadda ee si qoddobkan waafaqsan loo bixiyey waxay ku kooban tahay cidda la siiyey oo keliya, mana bannaana in lagu wareejiyo cid kale, haddaan oggolaansho qoraal ah laga helin Komishanka inta aan la wareejin.

## Qodabka 35aad: Nuxurka Ruqsada hirarka

Nuxurka qoraalka Ruqsadda waxaa ku ku jira shuruudaha Komishanku u arko lagama maarmaan oo ay ka mid yahiin shuruudo gaar ah oo la xidhiidha tayada isticmaalka mawjaddaha raadyaha.

## Qoddobka 36aad: Ku dhaqanka Ruqsadda Mawjadda

**1)** Ruqsadlaha la siiyey ruqsadda isticmaalka hirarka waxa uu raacayaa (conform) shuruudaha iyo tilmaamaha u gaarka ah Ruqsadda oo ay ku jiran.

- **a)** Hirarka loo cayimay.
- **b)** Nooca anteennada iyo rugta u gaarka ah
- **c)** Soohdinta gaarka ah ee ruqsadda loo bixiyey si looga dhiso rugta wareegta ee aan waayirka lahayn.
- **d)** Halka antennada laga taagayo.
- **e)** Caddaymaha heerka aqooneed ee maamulaha Rugta Raadiyaha (Radio Station).
- **f)** Shardi kasta oo kor u qaadaya tayada iyo shaqo wanaagga mawjada Raadyawga.

**2)** Komishanku waxa ay kormeerayaan isticmaalka Ruqsadlaha ee hirarka Raadyawga.

**3)** Komishanku waxa ay awood u leeyahiin in ay qaadaan tallaabo kasta oo u sahlaysa inay xayiraan hirarka aan sharciyaysnayn isla markaana waxa ay hubinayaan fulinta shuruudaha Ruqsadda.

**4)** Komishanku waxa ay awood u leeyahiin in ay u kuur galaan qalabka Raadyawga ee la shaarciyeeyey isticmaalkiisa, si loo hubiyo in uu waafaqsana yahay shuruudaha Ruqsadda iyada oo lala xidhiidhayo ciidanka Qaranka Somaliland iyo hay'addaha ammaaanka si loo hubiyo in aan lagu xad gudbin nidaamkana la raacayo.

## Qoddobka 37aad: Wax ka bedelka iyo laalista Ruqsadda Hirarka

**1)** Iyada oo la raacayo Qod. 36aad ee xeerkan Komishanku waxa uu wax ka bedeli karaa shuruudaha Ruqsadda Mawjadda.

**2)** Komishanku waxa ay awood u leeyahiin inay laalaan Ruqsadda hirarka ka hor intaan mudadeedu dhammaan, haddii la helo mid ka mid xaaladahan hoos ku tilmaaman:-

- **a)** haddii Ruqsadluhu oggolaado laalista Ruqsadda
- **b)** haddi Komishanku laalo ruqsadda iyada oo la raacayo xaladaha ku xusan Qod 36aad ee xeerkan.
- **c)** dhammaadka ama laalista liisanka isgaadhsiinta ee uu Ruqsadluhu u haysto hirarka.
- **d)** haddii Maxkamad awood u lihi ku xukunto Ruqsadlaha mufalisnimo ama ay joojiso ganacsigiisa halkaas oo dhammaan mawjadihiisu ku soo noqon doonaan gacanta Komishanka.

## Qoddobka 38aad: Rarista Cutubka Mowjadaha

**1)** Komishanku si ay u sameeyaan adeeg cusub oo isgaadhsiineed, iyaga oo raacaya xeerka caalamiga waxa ay awood u leeyahiin in ay ka raraan cidda la siiyey cutub mawjado ah iyada oo la siinayo magdhaw u qalma, isla markaana u ballan qaaday in ay ugu yaraan sannad gudihiis ku banneeyaan goobtii laga raray.

**2)** Iyada oo la raacayo magdhawga laysla oggolaaday, Rarista cutubka mawjadaha waxa uu ku dhaqan galayaa heshiis dhex mara Komishanka iyo ruqsadlaha isticmaalaya :-

- **a)** Cutub mawjaddaha ah ee ururka isgaadhsiinta caalamiga ahi u qoondeeyey hay'adaha dawladda.

**b)** Cutubka mawjadaha ah ee ay isticmaalayaan ciidanka Qaranka, Ciidanka, Ammaanka, (Boliska), Ciidanka, Asluubta, Hay'adda Dekedaha iyo waaxda Duulimaadyada Rayidka ah.

**c)** Cutubyada mawjadaha ah ee Wasaaradda Warfaafintu u qoondaysay gudbinta iyo qaybinta barnaamijyadda ee Raadyaha iyo Telefishinka.

**3)** Qof kasta oo isticmaala mawjadaha isla markaana aan ka hor imanayn faqradaha (1aad) iyo (2aad) ee qodobka wuxuu ku wargelinayaa Komishanka qoraal ahaan helitaanka Mawjadaha uu qoondeeyay Komishanku si waafaqsan qoddobka 43aad.

### Qoddobka 39aad: Dib u eegista iyo dib u qaabaynta Mawjadaha Raadyawga

**1)** Komishanku waxa uu muddo aan ka badnayan 6 bilood gudahood oo ka bilaabanta maalinta xeerkani dhaqan galo dib u eegaysaa dhammaan xaaladaha hirarka raadyawga ee markaa jira iyaga oo la kaashanaya qorshaha loo dejiyey ee ugu habboon Hirarka raadyawga.

**2)** Dhammaan adeegsadayaasha hirarka raadyawgu waxaay 3 bilood gudahood oo ka bilaabanta maalinta xeerkani dhaqan galo, u soo gudbinayaan hay'adda xog dhammaystiran oo ku saabsan hirarka ay isticmaalayaan, Komishankuna waxa ay siinayaan ruqsadda hirarka iyaga oo raacaya shuruudaha ay dejiyeen iyo baahidooda xilligaa.

### Qoddobka 40aad: Ku dhaqanka heshiisyada caalamiga ah iyo xeerarka kale

Marka Komishanku isticmaalayo awoodaha cutubkani siiyey waxa ay fulinayaan waajibaadka ka dhasha heshiisyada caalamiga ah ee Soomaaliland darafka ka tahay iyo xeerarka maamulaya Hawada, Badda, iyo Cimilada.

## CUTUBKA 9 aad: Lambarrada Isgaadhsiinta

### Qoddobka 41aad: Qorshaha Lambarada ee heer Qaran

**1)** Waxa reeban in loo isticmaalo lambarrada ujeedo aan ahayn ujeedooyinka ku xusan Qorshaha lambaradda ee heer qaran.

**2)** Inta ka horraysa dhammaystirka qorsha lambarrada ee heerka Qaran ciddii danaynaysa waxa la siinayaa fursad ay kaga dhiibtaan ra'yigooda iyada oo lagu dhaqmayo hufnaanta, kala socid la'aan iyo wada tashi.

## Qoddobka 42aad: Qoondaynta Lambarrada

**1)** Lambarrada waxa la siinayaa Ruqsadale kasta kaasi oo ugu baahan lambarradan qabashada adeegyada.

**2)** Go'aanka qoondaynta hal lambar ama ka badan waxaa lagu qaadanayaa 20 maalmood gudahood oo ka bilabmaya qabashada codsiga.

**3)** Komishanku waxa uu daabacayaa foom guud oo loo isticmaalo codsiga lambarrada, Komishanku ma dalbanayo in ka badan xogta loo bahan yahay.

## Qoddobka 43aad: Diidmada Codsiga

**1)** codsiga qoondaynta lambarrada waxaa la diidi karaa marka la helo mid ka mid ah xaaladahan:

- **a)** Haddii codsaduhu aanu haysan ruqsad uu ku bixin karo adeegga.
- **b)** Haddii codsigiisu aanu waafaqsanayn Qorshaha lamabaradda ee heer Qaran.
- **c)** Haddii ay muuqato in Ruqsadlaha codsanayaa aanu fulin doonin shuruudaha sharci ee la xidhiidha qorshaha tiraynta ee qaranka.
- **d)** Haddii codsigu ka hor imaanayo sharciga, xeer hoosaadka, iyo wareegtoyinka.

**2)** Codsiga qoondaynta waxaa la diidi karaa qayb ahaan.

- a) Haddii ay u muuqato in sticmaalka tiradu suurta gal ku noqonayn sannad gudihiis oo ka billabanta xilliga oggolaanshaha
- b) Haddi ujeedada isticmaalka tiradu aanu ku caddayn codsiga.
- c) Hadii looga baqo amniga dalka.
- d) Haddi codsiga laga fahmo in ujeedada laga leeyahay tahay ganacsi.
- e) Haddii ujeedada codsigu u baahnayn tiro.

## Qoddobka 44aad: Kaydinta lambarrada

**1.** Haddii laga codsado Komishanka waxa lamabarrada loo kaydin karaa codsadaha muddo 3 sannadood ah, mudadaa gudaheedana waxa loo fasaxi karaa Ruqsadlaha tiradii loo kaydiyey oo keliya.

**2.** Waxaa la dabaqayaa Qodobka 49aad.

## Qoddobka 45aad: Diiwaan gelinta lamabarrada

**1)** Komishanku waxay haynayaan diiwaan guud oo ka kooban dhammaan lambarrada xaddidan, kuwa kaydka ah, iyo cidda lambaradda loo qoondeeyey iyo kuwa loo kaydiyay.

2) Iyada oo laga qaadayn wax kharash ah Qof walba diiwaanku waa u furan yahay, waxaana xaddidaya rugtiisa Komishanka.

3) Marka ay jirto sabab amni, ama ay saamaynayso qof gaar ah, magaca iyo ciwaanka warbixinta waa la qarinayaa (Joojinayaa).

### Qoddobka 46aad: Suurtagalnimada La Wareegidda Lambarka

1) Qaybo gaar ah oo ka mid ah adeegga isgaadhsiinta waxa loo igman karaa inay fuliyaan waajibaadka kala ah:
   - a) Suurtagelinta sii wadida isticmaalka lambarrada haddii isticmaaluhu ka baxo heshiiskii, cida kalena ka qaadato Ruqsadda.
   - b) Suurtagalnimada sii wadida isticmaalka lambaradda haddii isticmaaluhu bedelo ciwaanka jiho gaar ah.
   - c) Suura galnimada sii wadida isticmaalka lambarrada, ujeedo kale sida ku cad wareegtada.

2) Ruqsada lagu waajibiyey ku dhaqanka Qoddobka 52aad, qaybta (1aad) waxaa ku waajib ah ogolaanshaha sii isticmaalka lambarrada, ujeedo la mid ah tii loo isticmaalay heshiiska ka hor.

3) Ruqsadlaha ku cayiman Qoddobka 52aad, faqradisa (a) waa in uu xaqiijiyaa in shebekediisu awood u leedahay fulinta waajibaadka ku xusan Qoddobkan ama wareegtada la soo saaray si waafaqsan Qoddobkan, iyo tacriifada isku xidhkaasi hoose iyadoo la dhawrayo waajibaadka ku xusan Qod 46.aad qaybta (a), waxaana ka go'aan gaadhaya Komishanka.

## CUTUBKA 10aad: XEER U SAMEYNTA SAYLADDA ISGAADHSIINTA (REGULATING)

### Qoddobka 47aad: Sugidda shirkadaha leh awoodda sayladeed

1) Si loo xoojiyo xidhiidhka iyo iskaashiga Wasaaradda iyo Shirkadaha isgaadhsiinta, Komishanku waxa uu sugayaa shirkad ama shirkadaha leh awood sayladaha soo socda:
   - a) sayladda ama suuqa shabakadda telefoonada gacanta
   - b) sayladda adeegga telefoonada gacanta
   - c) sayladda shebakadda telefoonka ee rakiban(fixed)
   - d) sayladda adeegga khadka rakiban.
   - e) sayladda isku-xidhka
   - f) sayladda khadka telefoon ee kirada ah
   - g) saylada adeega internetka

**2)** Komishanku waxa uu aqoonsanayaa awoodaha syladda isgaadhsiinta ee shirkadaha kala duwan.

**3)** Si loo gaadho go'aanka kala mudnaanta shirkadaha isgaadhsineed, Komishanku waxa uu badhis ku samaynayaa ugu yaran qoddobada soo socda:

**a)** Awooda Ruqsadluhu u leeyahay raadaynta sayladda.
**b)** Dakhliga ruqsadlaha ee xagga suuqa marka laga eego dakhliga guud ee suuqa.
**c)** Awooda dhaqaale ee ruqsadlaha.
**d)** Mihnadda iyo waayo-aragnimada Ruqsadlaha ee uu ku fulinayo adeegyada iyo wax soo saarka saylada.

## Qoddobka 48aad: Awood u yeelashada iyo wajibaadka

## Isku xidhka

**1)** Komishanka waxa xil ka saaran yahay in ay fuliso isku-xidhka (interconnection) iyada oo adeegsanaysa ciddii ku habboon oo gacan ka siin karta. Komishanka iyada oo si siman ugu adeegaysa shirkadaha isgaadhsiinta isla markaana dhowraysa danaha qaranka sida nabadgelyada iyo adeeg hufan oo loo fidiyo macaamisha waxa ay ka hawlgelaysaa u gogolxaadhidda isku-xidhka, diyaarinta isku-xidhka iyo haddii ay ka fursan waydo meel marinta isku-xidhka. Sidoo kale Komishanku waxay ka hawlgelayaan isku soo dhoweynta shirkadaha isgaadhsiinta.
**2)** Iyada oo la dhawrayo ujeedooyinka isku xidhka ee dhinaca dhaqaaalaha, farsamada iyo habsami usocodka isku xidhka , waxaa loo samayn doonaa xeer hoosaad ay kawada qayb galaan dhamman dhinacyada ay khusayso.
**3)** Si loo hir geliyo Nidaamka isku xidhka telefoonada waxaa Wasiirka Wasaaraddu xeer wasiir ku soo saarayaa habka ka wada faa,iidaysiga isku xidhka iyo jaangoynta qiimaha isku xidhka.

## Qoddobka 49aad: Waajibaadka ku salaysan Qiimaynta

**1)** Wasaaradda oo u adeegsanaysa Komishanka waxa waajib ku ah in ay kor ka ilaaliyaan danaha macaamiisha iyada oo aan laga tegayn dhiirrigelinta tartanka iyo suuqa xorta ah. Sidaa darteed Wasaaradda waxa waajib ku ah in ay dejiso qiime ku jihaysan heerarka ganacsi ee jumladda iyo tafaariiqda.

**2)** Wasaarada iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Maaliyadda isla markaana wada tashi la yeelanaysa shirkadaha isgaadhsiinta waxa xil

ka saaran yahay in la soo xeereeyo cashuuraha ku waajibay isgaadhsiinta iyada oo loo raacayo tacriifada.

**3)** Wasaaradda/Komishanka ama cid madax bannaan oo maamulku u egmaday ayaa baadhis ku samaynaya sanadkiiba mar si loo hubiyo in ruqsadlaha isgaadhsiintu dhaqmo sida ku cad qodobka guud ahaan iyo gaar ahaan habka xisaabaadka.

## Qoddobka 50aad: Waajibka Tacriifada dib u Iibiyeyaasha

**1)** Ruqsadlaha isgaadhsiinta ee leh awood sayladeed, waxa ku waajib ah in aanu culays saarin macaamiisha isaga oo aan oggolaansho ka helin Komishanka.

**2)** Komishanku waxa uu hubinayaa tacriifadu in ay waafaqsan tahay xeerarka maaliyadeed ee dalka.

## Qoddobka 51aad: U Sinnaanta Waajibaadka.

Ruqsadlaha leh awood sayladeed waxa ku waajib ah in uu ku dhaqmo xaalad la mid ah duruufaha taagan, iyada oo maanka lagu hayo in isku-xidhku yahay dan qaran iyo danta macaamiisha.

## Qodabka 52aad: Waajibaadka Hufnaanta (Tranceparancy obligation)

**1)** Komishanku waxa uu awood u leeyahay in uu ka go'aan gaadho xogta la faafin karo ee la xidhiidha, awood u yeelashada iyo isku xidhka hoose ee shirkadaha leh awood sayladeed, taas oo qeexaysa tacriifada iyo xaaladaha kale ee la xidhiidha isku xidhka iyo awood u yeelashada farsamada iyo dabeecadaha kale ee la xidhiidh shebekada ama qayb kasta oo ka mida xogaha.

**2)** Wasaaraddu waa in ay faafisaa, tixraac sugan (referece offer) iyada oo Komishanku awood u leeyahay in uu go'aamiyo qaabka uu yeelanayo isku xidhka taas oo uu ku jiro tixraac sugan iyaga oo bixinay tafaasiisha dhammaystiran ee sugnaanta si waafaqsan saylada, baahida, shuruudaha shirkaddaha iyo shuruudaha ku lifaaqan qiimaha.

### Qoddobka 53aad: Waajibaadka shirkadaha ka saran macaamiisha

1) Shirkadaha isgaadhsiinta waxaa ku waajib ah in ay macamiisha ula dhaqmaan si siman iyo xaalado isku mid ah.

2) Si Komishanku uga go'aan gaadho shirkadaha leh awoodda sayladeed waxaa waajib ah in aan adeegna lagu xidhin adeeg kale,

3) Komishanka ayaa ka go'aan gaadhaya sida shirkadaha leh sayladdu u faafinayaan xogta, xogta la baahinayo iyo qaybaheeda.

## CUTUBKA 11aad: ILAALANTA MACAAMIISH

### Qoddobka 54aad: Aragtida Adeegga Guud

1) Macmiil kasta waxa uu xaq u leeyahay iyada oo aan loo eegayn deegaankiisa, in uu helo adeegyada soo socda, isaga oo ku helaya tayo fiican iyo qiime macquul ah.

   a) In loo oggolaado galaangal u yeelashada shebekedda Taleefoonada guud isaga oo raacaya codsi macquul ah iyo in awood loo siiyo adeegga taleefoonada guud ee meel ku dhidban.
   b) Tilmaam bixiyaha taleefoonada ee daabacan.
   c) Adeegga macaamiisha
   d) Tilmaam bixiyaha taleefoonada ee danabaysan.
   e) Tusaha taleefoonada ee danabaysan (Electronic telephone guides).

2) Komishanku waxa uu soo saarayaa qawaacid maamulaya tayada adeega iyo qiime macquul ah oo lagu bixiyo adeega ku xusan faqradda hore.

### Qoddobka 55aad: Shirkada adeegga Guud

1) Haddii Komishanku ku qanaco in adeegga ku xusan Qod. 54aad xubinta (1aad) aan shirkaduhu samaynin, waxa uu u dejinayaa hab loogu xil saarayo hal shirkad, ama in ka badan oo noqonaysa shirkadaha bixinaya adeega guud mudo 5 sano ah isaga oo u xaddidaya jiho go'an.

2) Habka Komishanku dejisay waa in u xaqiijin karo in shirkadda ama shirkadaha adeegga guud awood u leeyihiin in ay ku gudbiyaan qiimaha u hooseeya marka loo eego shirkakadaha kale.

3) Looma aqoonsan karo shirkad adeeg bixiye guud haddii Komishanku ku qanaco in aan shirkaddu awood u lahayn fulinta adeegga laga sugayo.

## Qoddobka 56aad: Maalgelinta adeega guud

**1)** Wasiirku waxaa xil ka saran yahay diyaar garaynta miisaaniyada adeegga guud. si waafaqsan Qod. 67aad faqradiisa 1aad waxaana maamulaya Komishanka.

**2)** Miisaaniyada adeegga guud waa in ay xaqiijisaa qiimaha saafiga ah, oo looga jeedo faraqa u dhexeeya qiimaha tacriifada iyo faa'iidada adeegga la bixiyey ee loo celinayo ruqsadlaha ama ruqsadlayaasha bixiya adeegga guud si waafaqsan Qod.54aad faqradiisa 1aad.

**3)** Iyada oo Wasiirku wareegto ku soo saari doono shuruuddaha la xidhiidha adeegga guud, waa in ay ku jiraan:-

- **a)** Qoddobada maamulay Maaliyada adeegga guud.
- **b)** Qoddobada la xidhiidha adeegga ee tilmaamaya in adeegga loo maal geliyo si waafaqsan Qod. 54aad.
- **c)** Qoddobada maamulaya sida loo bixinayo kharashka miisaaniyadda adeegga guud iyada oo la xaqiijinayo in ay u dhacday si hufan oo aan wax madmadaw ah lahayn.

## CUTUBKA 12aad: Ilaalinta xogta iyo sirta gaarka ah

## Qoddobka 57aad: Waajibaadka.

**1)** Iyada oo aan la jebinayn Cutubka 11aad , isla markaana laga hortegayn farsamada kaydinta xogta, Xidhiidhka isgaadhsiineed ee dhex mara macaamiishu waxa loo aqoonsanayaa sir qarsoon.

**2)** Ruqsadle walba waxaa ku waajib ah in uu qaado talaabooyinka macquulka ah si uu u xaqiijiyo sida ugu sarraysa ee lagu ilaalin karo sirta macmiilka.

## Qoddobka 58aad: Xogta Tacriifadda

**1)** Iyada oo aan la jebinayn faqrada soo socota, ruqsadluhu wuxuu tirtiri karaa xogta socota ee macaamiisha mar kasta oo ay muuqato in xogtu aanay wax adeegga qabanayn.

**2)** Ruqsadlaha waxa u banaan in uu kaydiyo iyo in uu isticmaalo xogta socota inta uu uga baahan yahay si uu ugu isticmaalo qaansheegtiisa, taas oo ay ku jirto awood u yeelashada loo siiyey ruqsadle kale, maadama mudada kaydintu ka badnayn diyaarinta qaanshegta iyo bixinta qaanta ruqsadlaha.

**3)** Ruqsadlaha waxaa u bannaan in uu kaydiyo xogta ilaa inta ay lagama marmaan u tahay:-

a) Hawlaha adeegga ama cilmi baadhsita ee la xidhiidha adeegga.
b) Qoddobada adeegga dheeraadka ah ee la siiyey macmiilka isaga oo xaq u leh in uu diido adeegga dheeradka ah.

4) Waxaa Ruqsadlaha u bannaan in uu la wadaago Komishanka iyo Maxkamadaha, xogta socota si loo xalliyo khilaafka si waafaqsan Xeerkan.

## Qoddobka 59aad: Meelaynta Xogta ( location Data)

Xogta meelaysan ee aan ahayn xogta socota lama isticmaali karo haddii aan:-

1) Xogta socota laga dhigin mid aan hayb lahayn.
2) Haddii ruqsadluhu helay oggolaanshaha macmiilka ka hor inta aanu isticmaalin iyada oo la eegayo adeegga dheeraadka ah ee macmiilku helo.
3) Inta aanu bixin oggolaanshaha waa in uu ruqsadluhu uga xog waramaa macmiilka:-

a) dabeecadda xogta kaydsan ee la diyaariyey
b) sababta xogta kaydsan loo isticmaalayo
c) shuruudaha lagu isticmaali karo
d) haddii xogta lala wadaagayo daraf kale iyada oo lala eegayo qoddobada adeegga dheeraadka ah.

4) Ruqsadluhu wuxuu u oggolaanayaa macmiilka in uu si ku meel gaadh ah isu hortaago socodsiinta xogtiisa isaga oo la noqon kara oggolaanshaha uu bixiyey.

## Qoddobka 60aad: Nidaamka Iswada (Automated Systems)

1) Iyada oo aan la jebinayan faqrada 2aad Qoddobkan isticmaalka habka iswada, iyada oo dadku fargelinayn dhambaalada (fax) iyo farriimaha (message) danabaysan ee loo adeegsado ganacsiga, waxa la isticmaali karaa haddii qofka dirayaa caddayn karayo in cida loo dirayaa oggolaatay in loo soo diro.

2) Qof kasta oo ku hela macluumaad xidhiidhka farriimaha danbaysan inta uu iibinayo wax soo saarkiisa ama adeeggiisa, waxaa loo oggol yahay in uu dib u isticmaalo macluumaadka isaga o u adeegsanaya ujeddada hore oo keliya. Macmiilku si cad oo qeexan waxa uu u diidi karaa dib u isticmaalka, iyada oo aan waxba laga qaadayn si fududna uu u gudbin karo cabashadiisa isaga oo isticmaalaya xaqiisaa mar kasta oo loo soo diro farriin danabaysan.

3) Farriimaha danabaysan ee leh dabeecadda loogu xusay faqradda (1)aad waxaa waajib ah in ay xambaarsan yahiin wax caddynaya diraha,

cinwaankiisa boosta, lambarkiisa telefoonka, si qofka macmiilka ahi u awoodo in uu ka codsado joojinta xidhiidhkaas laga soo hadlay.

### Qoddobka 61aad: Garashadda Diraha

**1)** Ruqsadle kasta oo sameeya adeeg suuragelinaya in la garto lambarka soo diraha, waxa uu u ogolaanayaa macaamiisha in iyadoon wax khidmad ah laga rabin la tusi karo garashada lambarka diraha, qaab dhismeedkiisa guud ahaan ama qaarkood.

2) Komishanku waxay soo saari doonaan go'aan ay ku jiraan shuruudo la xidhiihda garashada lambarka la soo hadlaha, taas oo ay ku jirto suurta galnimada in uu iska xidho la soo hadalka ama habka garashad la soo hadlaha, habka loo maamuli karo la soo hadlaha dalka dibeddiisa.

## Cutubka 13aad: Amaanka Qaranka

### Qoddobka 62aad: Waajibaadka

**1)** Waxaa ku waajib ah ruqsadle kasta marka uu jiro khilaaf laga yaabo in uu raadeeyo ammaanka qaranka in uu fuliyo soo jeeddinta Wasaaradda ee la xidhiidha in mudnaan la siiyo isgaadhsiinta Ciidamada ama hay'ad kasta oo shicib ah oo la shaqaysa.

**2)** Waa in Ruqsadluhu fuliyaa codsiyada hay'ad kasta oo awood u leh la socodka iyo dabagalka taleefoonada isla markaana u gudbiyaa Lambarka macmiilka la doonayo, adeegga loo qabtay macmiilka iyo haddii looga baahdo magaciisa iyo xogta la xidhiidha**.**

**3)** Waxaa ku waajib ah ruqsadlaha in uu ilaaliyo sirta xogta lagu xusay faqrada 2aad iyo codsiyada laftooda, iyo in aanu oggolaan in si sharci darro ah loo adeegsado.

**4)** Waxaa wasiirku soo saari doonaa wareegto ay ku xusan tahay la socodka iyo dabagalka xidhiidhka isgaadhsiinta iyo diyaar garaynta xogta ay dalbadaan hay'adaha awoodda u leh kuwaas oo ay ku jiraan:-

- **a)** Farsamada lagama maarmaanka u ah dabagalka xidhiidhka iyo adeega lagu raad jiro.
- **b)** Talaabooyinka laga rabo in ruqsadluhu ka qaado cidda lagu daba jiro, iyo tallaabooyinka kale ee ku xusan Faqrada 2aad.
- **c)** Habka ruqsadluhu u soo gudbinayo xogta laga dalbaday ee ku xusan Faqrada 2aad ee Qoddobkan.
- **d)** Tallaabooyinka laga rabo in ruqsadluhu qaado si aan xogta ku xusan Faqrada 2aad loogu isticmaalin sifo sharci darro ah.

# CUTUBKA 14aad: HANTIDA GUUD IYO HANTIDA GAARKA AH.

## Qoddobka 63aad: Goobaha la wadaago

1) Ruqsadle kasta waxaa ku waajib ah in uu bixiyo waxyaalaha lagama maarmaanka u ah isticmaalka wada jirka ah ee anteenooyinka (Antenna masts).

2) Haddii oggolaanshaha qof kale shardi yahay, waa in qofkaasi oggolaado haddii ay lagama marmaan u tahay codsiga, isla markaana:
   a) Qofkaasi uu ku leeyahay maslaxad toos ah ama mid dadban.
   b) Qofkaasi ka mid yahay shirkad ku leh dan toos ah ama mid dadban.

3) Komishanku waxay awood u leeyahiin in ay go'aan ka gaadhaan shuruudaha dheeraadka ah ee la xidhiidha wadaagga anteenada. (Antenna masts) kuwas oo ay ka mid yihiin:-

   a) faafinta xogta anteenooyinka Ruqsadluhu haysto
   b) Qolka lagu xifdiyo birta anteenada haddii la wadaagayo iyo haddi si gaar ah loo adeegsanayo.
   c) Waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qaadashada go'aamada adeegga la wadaago ee anteenka.
   d) Cawil celinta Ruqsadluhu dalban karo ee la xidhiidha adeegga la wadaago ee anteendiisa.

## Qoddobka 64aad: Isticmaalka Hantida guud

Ruqsadlaha maamula shebekadda isgaadhsiinta guud waxa uu xaq u leeyahay in uu qotomiyo dhisme ama wax isku xidhaya dhismeyaal isgaadhsiineed oo kaabaya horumarinta iyo socdsiinta shebekaddiisa, isla markaana in uu ka dhinac taagi karo, ama hoos marin karo hanti guud, haddii la fuliyo shuruudahan:-

1) Haddii Komishanku u arko in hawshaasi lagama maarmaan tahay
2) Haddii shuruudaha ruqsaddu diidayn qabashada hawshaa.
3) haddii hay'ad awood u lihi siisay Ruqsadlaha awoodda in uu bilaabo hawsha
4) haddii talaabooyinka la qaaday ay lagama maarmaan u yihiin difaaca guud (**public protection**) iyo kabayaal jira xilliga dhismaha, hore u marin iyo maamulidda shebekadda Ruqsadlaha

5) Dib ugu soo cellinta hanti dan guud, sida ay ahayd inta aan hawsha la guda gelin, iyo dayactirka dhaawaca gaadhey hantida.
6) Ku dhaqanka qoddobada Wasiirku soo saaro si loo intifaacsado hantida danta guud.
7) Ruqsadlaha ay khusayso wuxuu xaq u leeyahay in uu fulliyo sii wadida, kaabayaal ama wax ka bedelo hadii ay jirto sabab macquul ahi

## Qoddobka 65aad: Ilaalinta Goobo Gaar ah

Ruqsadlaha maamulaaya shebekadda isgaadhsiin guud, markuu dhisme qotominayo, hore u marinayo ama sii wadayo shebekadiisa isgaadhsiinta wuxuu raacayaa xeerka iyo xeer hoosaadyada la xidhiidha ilaalinta deeganka, goobaha dalxiiska iyo taariikhiga ah.

## Qoddoka 66aad: Isticmaalka hantida Gaarka ah

1) Ruqsadlaha maamulaya shebedkada isgaadhsiinta guud wuxuu xaq u leeyahay in uu taago ama qotomiyo qalab iyo wax kasta oo la xidhiidha dhisme, kaas oo lagama marmaan u ah horumarinta dhisme iyo sii wadida shebekediisa, isaga oo dul marinaya, hoos marinaya, ama ka dhex dusinaya hanti ma guurto ah, oo gaar loo leeyahay, marka uu heshiis la gaadho mulkiilaha hantida gaarka ah ama qofka xaq u leh in shirkaddu siiso cawil celin  ku dhisan cadaalad.
2) Haddii Ruqsadlaha danaynaya iyo mulkiilaha hantida ma guurtada ah ama qofk xaqa ku leh heshiiis ka gaadhi waayaan  dhismaha waxa Komishanku soo saarayaa go'aan u oggolaanaya shirkadda in ay fuliso hawsha, haddii la helo shuruudahan soo socda:

   a) Haddii hawshu soo hoos gelayso hawlaha Komishanka taas oo la xidhiidha isla markana lagama maarmaan ay u tahay dhismaha, horumarinta, ama sii socodsiinta shebekedda isgaadhsiinta.
   b) Haddii aan la helayn qaab farsamo ama dhaqaale oo lagu xalliyo hawshaa kaas oo Komishanku awood u leeyahay.
   c) Haddii hawsha aanay ku jirin awoodaha Komishanka balse aanay waxba yeelayn isticmaalka caadiga ah ee qofku u isticmaali karo hantidiisa ma guurtada ah ama cida kale ee xaqa ku leh.
   d) Haddii shirkaddu siiso mulkiilaha leh hantida ma guurtada ah ama cid kasta oo xaqa ku leh magdhaw caadil ah oo Komishanku go'aamiyay isaga oo la tashanaya ciddii qiimayn karta.
   e) Shirkadda wax ku dhejinaysa dhismaha waa in ay raacdaa talooyinka iyo tilmaamaha Komishanka si looga fogaado ama loo xadeeyo khasaaraha soo gaadhi kara hantida ma guurtada ah.

3) Haddii shirkadda ama mulkilaha hantida ma guurtada ah ama cidda kale ee xaq ku leh heshiis ka gaadhi waayaan xaddiga cawil celinta waxa Komishanku go'aaminayaa magdhaw caadil ah oo la siiyo mulkiilaha

hantida ma guurtada ah ama cidii kale ee xaq ku leh, si taas loo gaadhana, Komishanku waxay kaashan karaan hal khabiir iyo in ka badan, waxaana qaadaya kharashka khubarada Komishanku u igmatay jaangoynta magdhawga shirkadda

## Qoddobka 67aad: La Wareegidda ( expropriation)

Haddii dhismaha ama horumarinta shebekadda isgaadhsiinta guud ay u baahato in shirkaddu yeelato hanti ma guurto ah oo qof kale leeyahay, isla mrkaana mulkiiluhu diido in uu kaga iibiyo qiimo macqul ah hantida ma guurtada ah ama qayb ka mida, Ruqsadlaha leh shebekedada isgaadhsiinta guud wuxuu xaq u leeyahay inuu dalbado wareejin loo wareejiyo hantida ma guurtada ah ama qayb ka mid ah taas oo aan waxba yeelayn isticmaalka qaybta hadhay ee dhismaha, haddii la raaco talaabooyinka soo socda:

**1)** In Ruqsadlaha danaynaya u soo gudbiyo Komishanka dalabkiisa, isaga oo codsanaya in la qaado talaabooyinka sharci ee lagama maarmaanka u ah la wareegidda isaga oo ku soo lifaaqaya codsigiisa waxyaabaha uu ka duulayo ama uu ku qotomo codsigiisu.

**2)** Haddii Komishanku ku qanaco in hantida ma guurtada ah ama qayb hantida ma guurtada ah aan looga maarmayn dhisidda ama horumarinta shebekadda isgaadhiinta isla markaana aanay muuqan xal dhaqaale ama farsamo oo arrinta lagu xallin karo oo macquul ah, waxa ay talooyin siinayaan Wasaaradda ay khusayso si ay u texgeliso mashuuraca dhisme ama horumarinta shebekada isgaadhsiinta isla markaana laga eego danta guud iyo tallaaboyinka la wareegidda iyo xeerka maamulaya.

**3)** Marka Wasiirku ka bogto sida ku xusan xubinta (2aad) waxa uu ansixinayaa tallooyinka Komishanka wuxuuna soo saarayaa go'aan ku wareejin hanti ma guurto ah ama qayb ka mid ah hanti ma guurto ah Ruqsadlaha, isaga oo raacay shuruuddaha iyo habka uu dhigayo xeerka maamula la wareegidda hantidu.

## Qodabka 68aad: Carqaladaha Dabeeciga ah

Haddii dhirta iyo waxyaalaha kale ee dabiici ahi carqaladeeyaan dhismaha ama horumarinta shebekadda isgaadhsiinta guud, isla markaana mulkiilaha iyo shirkada leh shebekaddu heshiis isla gaadhi waayaan mudo macqmuul ah, shirkadda leh shebekaddu waxay la xidhiidhaysaa Komishanka oo ka dib marka uu hubsado in aanay jirin xal kale oo farasamo ama dhaqaale, waxa uu soo saarayaa go'aan kama danbays ah iyaga oo la kaashanaya khabiir iyo in ka badan oo kharashkooda ay shirkaddu ka masuul tahay. Komishanka iyo khuburada ay u igmadeen hawsha ayaa soo jaangoynaya magdhawga

# CUTUBKA 15AAD

# Xallinta khilaafaadka

## Qoddobka 69aad: Khilaafaadka

**1)** Haddii khilaaf dhex maro laba ruqsadle ama ruqsadle iyo cid aan ruqsad lahayn, khilaafkuna la xidhiidho dhawridda iyo dhawrid la'aanta masuuliyadda sharcigani jideeyey, ama ku salaysan, mid ka mid ah darafyada khilaafka ayaa maamulka ka codsan kara xallinta khilaafka.

**2)** Khilaafka la xidhiidha heshiis u dhexeeya laba ruqsadle sida ku xusan Faqrada (1aad) oo ku saabsan in heshiiska ka dhexeeyaa ama habka loo fulinayaa waafaqsan yahay xeerkan iyo in kale , ama xeer hoosaad laga dheegtay xeerkan ama go'aan maamul oo Komishanku soo saaray, Komishanka waxaa ka mamnuuc ah xallinta khilaafaadka, haddii labada daraf ee khilaafku u dhexeeyaa sidaas codsan.

**3)** Waxaa ka reeban Komishanka in ay ka go'aan gaadhaan khilaafka dhinacyadu u soo gudbiyeen haddii ay sidaa ka codsadaan

**4)** Iyada oo la fulinayo dalabka Komishanka, dhincyada khilaafku dhex yaalo, waxay u gudbinayaan Komishanka dhammaan xogta la xidhiidha xallinta khilaafaadka.

**5)** Darafyada ku lugta leh khilaafka, waxa ku waajib ah in ay Komishanka u hoggaansamaan iyaga oo u gudbinaya taageero kasta oo lagama marmaan u ah xallinta khilaafka, si loo fududeeyo xal u helidda khilaafka sida ugu dhakhsaha badan.

**6)** Waa in Komishanku kaga go'aan qaato khilaafka muddo ku siman 120 maalmood oo ka bilaabanta maalinta uu codsigu soo gaadhay iyaga oo ka qaadanaya go'aan kasta oo kor u qaadaya tartanka iyo ilaalinta danta macaamiisha.

**7)** Iyada oo aan la khilaafin faqrada (5aad) ee Qoddobkan, haddii xaalad degdeg ah ay jirto, Komishanku waxa uu qaadan karaa go'aan ku meelgaadh ah oo la xidhiidha codsiga xal u helidda khilaafka si ay ugu dhaqmaan darafyada khilaafku ilaa iyo inta la gaadhayo go'aan kama danbays ah.

**8)** Komishanku waxa ay ku kordhin karaan mudada ku xusan faqrada 6aad 60 maalmood oo kale, marka ay jiraan duruufo gaar ah oo xal lagu gaadhi kari waayay 120 maalmood gudahood, iyaga oo ku wargelinaya dhinacyada sida ugu dhakhsaha badan.

**9)** Komishanku waxa ay qeexayaan isla markaana faafinayaan habka loo marayo xallinta khilaafka, waana in habku xaqiijinayaa in qaybaha sayladda si fudud u helaan xallinta khilaafka, waana in Komishanku khilaafka u maareeyaa si macquul ah oo dhexdhexadnimo ku dheehan tahay.

**10)** Darafyada khilaafku waxaa dhamaantood ku waajiba ku dhaqanka go'aanka.
**11)** Go'aanka maamulka waxa lagu daabacayaa barta internetka ee Wasaaradda/Komishanka, marka laga reebo xogaha loo arko sir ganacsi.

### Qoddobka 70: Khilaafka u dhexeeya Ruqsadlaha iyo Macmiisha

1) Haddii khilaaf dhex maro ruqsadle iyo isticmaale/macmiil kaas oo la xidhiidha dhawridda iyo dhawrid la'aanta waajib xeerku saaray ruqsadlaha, ama xeer hoosaad loo soo saaray si xeerkan waafaqsan ama go'aan Komishanku soo saaray waxa uu macmiilku Komishnka ka dalban karaa xallinta khilaafka.
2) Xalinta khilaafka waxa loo marayaa sida ku xusan Qod 69 faqrada 2aad ilaa 11aad.
3) Hadii daraf ka mid ah darafyada khilaafku ku qanci waayo go'aanka ay soo saareen komishanku waxa uu u rafcaan qaadanayaa maxkamada Rafcaanka.

# Cutubka 16aad

# Fulinta iyo ciqaabaha

### Qoddobka 71: Awooddaha iyo Ciqaabta Komishanka

1) Komishanku waxaay awooda u leeyahiin in ay hubsadaan fulinta dhammaan go'aanada iyo tallaabooyinka la qaaday si loo fuliyo xeerkan ama xeer hoosaad loo soo saaray si xeerkan waafaqsan.
2) Si loo helo kormeer sugan ee sayladeed dhammaan ruqsadlayaasha waxa ku waajibay in ay fulliyaan codsiyada Komishanka ee la xidhiidha xogta.

### Qoddobka 72aad: Warbiximaha

1) Gudoomiyaha Komishanka ee awoodda leh haddii uu xaqiiqsado in ruqsadle ku gefay ama weli ku gefayo waajib xeerkani farayo ama xeer hoosaad loo soo saaray si waafaqsan xeerkan ama go'aan maamul oo Wasaaradda/Komishanku soo saareen waxa uu diyaarinaya warbixin qoraal ah.

2) Warbixinta ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkan waxaay ugu yaraan ka koobnaanaysaa:
    - **a)** Tafaasiil dhammaystiran oo ka hadlaysa dhacdooyinka iyo duruufaha ku xeeran ee kaabaya warbixinta.
    - **b)** Xilliga uu dhacay xadgudubku iyo meesha uu ka dhacay.

c) Tixraaca sharciga lagu xadgudbay, xeer hoosaadka ama go'aan maamul.

3) Waa in sida ugu dhakhso badan nuqul warbixinta ah loo diraa ruqsadlaha ay khusayso.

### Qoddobka 73aad: Fulinta xukunka

1) haddii Komishanku ogaado in ruqsadluhu ku xad gudbay ama sii wado ku xadgudubka waajibka sharcigu saaray shirkadda, ama xeer hoosaad loo soo saaray si xeerkan waafaqsan ama go'aan maamul oo Komishanku soo saaray, waxa Komishanku awood u leeyahay:

   a) In ay amraan ruqsadlaha bixinta ganaax mudaysan, iyada oo la siiyano ruqsadlaha muddo macquula ah oo uu ku joojiyo xadgudubka la tilamaamay, hadduu joojin waayana wuxuu bixinayaa ganaax maalinle ah oo ka dhashay sii wadida jebinta xeerka.
   b) In la amro ruqsadlaha in uu bixiyo ganaax aan ka badnayan **70,000,000 S/L Sh( .** ama hadii taasi badan tahay 10% dakhliga ruqsadlaha ee Somaliland

2) Iyada oo aan la eegayn habka fulinta ee Komishanku doortay, waa in ganaaxa iyo mudada bixinta la isu dheellitiraa, lana eego nooca xadgudubka, khasaraha ka yimaada, faa'iidada iyo dakhliga soo galay ruqsadlaha mudada xadgudubka socday. ganaaxa waa in lagu bixiyaa 50 maalmod gudahood ka dib marka Ruqsadlaha la ogaysiiyo go'aanka, dhamaan ganaxyadana waxaa lagu shubayaa Miisaaniyadda guud ee dawladda.
3) Go'aanka ku xusan faqrada (1aad) waxaa la qaadan karaa ka dib marka la siiyo ruqsadlaha fursad uu kaga jawaabo warbixinta lagu xusay Qod. 80aad.
4) Go'aanka maamulku wuxuu noqonayaa dhiirigelin.

# Cutubka 17aad: Dib u Eegista Sharciga

### Qoddobka 74aad: Dib u eegista Go'aamada Komishanka

1) Ruqsadle kasta oo si toos ah uu u raadeeyey go'aakan Komishanku qaadtay waxa uu xaq u leeyahay in u ka dalbado Komihanka in dib loo eego go'aankaas waana in Komishanku aqbalo codsiga haddii aan 40 maalmood ka soo wareegin taariikhda la faafiyey go'aankaas.
2) Marka dib loo eegayo go'aanka waa in Komishanku doc walba ka eegaa codsiga.

3) Go'aan ka gaadhista codsiga dib u eegista waa in uu noqdaa mid si sax ah loo sababeeyey, isla markaana lagu soo saaro 60 maalmood gudahood oo ka bilaabanta taariikhdii la qabtay.
4) Komishanku waxa ay xaq u leeyahiin in ay hakiyaan go'aanka 20 maalmood, haddii cabashadu tahay mid culus iyada oo darafyada lagu wargelinayo qoraal 20ka maalmood ee kor lagu sheegay gudahood.
5) Komishanku kama go'aan gaadhi karo dib u eegista iyaga oo aan siin dhinacyada fursad ay ku sharaxaan cabashooyinkooda iyada oo dhegaysiguna noqonayo mid furan.

## Qoddobka 75aad: Racfaanka Go'aanka Komishanka

1) *Haddii komishinku go,aankiisii hore ku adkaysto waxaa ruqsadluhu cabatin qoraal ah u gudbinayaa wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta muddo 30 cisho gudahood ah. Wasiirkuna wuxuu ka geli karaa dhexdhexaadin Haddii dhexdhexaadintaa wasiirka lagu qanci waayo waxaa shirkadu dacwadeeda u gudbinaysaa maxakamadda awooda u leh.*
2) Go'aanka Maxkamdda awooda u leh waa in uu noqdaa mid sharci waafaqsan oo ka wada jawaabaya dhamaan khilaafaadka, isla markaana ku soo baxa 120 maalmood gudahood oo ka bilaabanta taariikhda kaalinta maxkamadu qabatay racfaanka.
3) Maxkamadda sare waxay hakin karta soo saarista xukunkeeda 30 maalmood oo kale, hadii dacwaddu tahay mid culus iyada oo ku wargelinaysa dhinacyda ay khusayso qoraal, ka hor intaan 120 maalmoodka dhammaan.
4) *Dhinacyadu waxay xaq u leeyihiin in maxkamadda horteeda la siiyo fursad ay ku doodaan isla markaasna qabsadaan qareenno.*

## Qoddobka 76aad: Hakinta

1) Codsiga dib u eegista ee ku xusan qod 74aad ama rafcaanka go'aanka Komishanka Qodobka 75aad ma hakinayo go'aanka Komishanka.
2) Ruqsadlaha ka codsaday Komishanka dib u eegis ama ka rafcaan qaatay go'aankeeda wuxu ka dalban karaa Maxkamadda in la hakiyo dhaqan galka go'aanka Komishanka inta uu ka soo baxayo xukunku.
3) Maxkamaddu waxay hakin kartaa go'aanka haddii hakintu aanay sababaynin khasaare aan la kaabi karin iyo haddii go'aanka Komishanku aanu waafaqsanayn habka.
4) Maxkamaddu waxay codsiga hakinta kaga go'aan gaadhaysaa 15 Maalmood gudahood marka codsiga la soo dhammaystiro.
5) *Hakinta go,aanka laga soo racfaan qaatay ee Maxkamadda Sare wax shardi ah kuma xidhna maxkamaduna haddii ay lagama maarmaan u aragto waa laali kartaa inta dacwadda go,aan kama dambays ah laga soo saarayo.*

### Qoddobka 77aad: Nuxurka Codsiga Racfaanka ama Dib u eegista

Racfaanka ama codsiga dib u eegista waa in xogta soo socotaa  ka muuqataa:-

1) Magaca iyo cinwaanka Ruqsadlaha soo gubiyey codsiga ama Rafcaanka.
2) saxeexa cida awooda u leh in ay metesho Ruqsadlaha
3) go'aanka Komishanka oo asbaabta codsiga dib u eegista ama Rafcaanku ku lifaaqan yahay.

# Cutubka 18aad

**LAKALA WAREEGIDA SHAQADA IYO HANTIDA**

### Qoddobka 78aad: La kala waregidda shaqada iyo hantida

1) Hawlaha xeerkani jiidaynayo ee markii hore Wasaaraddu maamuli jirtay, waxaay ku wareegayaan Komishanka marka Komishanku bilaabo shaqadooda iyada oo la tixraacayo xeer hoosaadkooda.

### Qoddobka 79aad: Xaaladda Shaqaalaha

Wasaaradu saddex bilood gudahood oo ka bilaabanta malinta xeerka laga ansaxiyo golayaasha qaran waxa ay soo saaraysaa wareegto muujinaya jaantuuskeeda hawlgalka Komishanka.

### Qoddobka 80aad: Kala Wareega

Shirkad kasta oo intaan xeerku dhaqan gelin hore wasaaraddu oggolaansho siisay, waxaa xeerku u aqoonsanayaa dhaqangal.

### Qodobka 81aad Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani waxa uu Dhaqan Galayaa marka uu Madaxweynuhu Saxeexo

C/casiis Maxamed Samaale
Guddoomiye-kuxigeenka 1aad Golaha Wakiilada
Ahna Kusimaha Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

C/risaaq Siciid Ayanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada